Guri ku yaalla Finland

AKHBAAR LOOGU TALAGALAY DADKA WADDANKA U SOO GUUREY OO KU SAABSAN DEGENAANSHAHA, WAXBARASHADA IYO ARRIMAHA BADBAADADA BULSHADA

WASAARADDA SHAQADA

TUSMADA BUUGGA:

HORDHAC **3**

La qabsashada waddanka? 3
Xaq u yeelashada kaalmooyinka bulshada (oikeus sosiaaliturvaan) 3

1. FINLAND KU AHAANSHAHA QOF WADDANKA U SOO GUUREY **4**

Caawimada turjubaanidda waa la codsan karaa 4
Barashada luuqadda 4
Dumarka iyo ragguba way shaqeeyaan 4
Adeegyada xafiiska shaqada 5
Dad cusub iyo hab nololeed cusub 5

2. DEEGAANKA IYO DEGGENAANSHAHA **6**

Xuquuqda ay leeyihiin dadka degmada deggan 6
Deggenaanshaha – guri aad leedahay mise mid kiro ah 6
- *Guriga kirada ah* 7
- *Heshiiska kirada* 7

3. DARYEELKA BULSHADA EE DEGGENAANSHAHA KU SALAYSAN IYO KUWA KALE **7**

Kaalmooyinka Kelada 8
- *Lacag maalmeedka bukaansocodka* 8
- *Megidda daawooyinka* 9
- *Kaalmada kirada* 9

Daryeelka caafimaadka shaqaalaha 9
Kaalmooyinka shaqo la'aanta 9
- *Lacag maalmeedka shaqo la'aanta* 9
- *Lacagta kaalmada shaqo la'aanta* 10
- *Lacag maalmeedka shaqo la'aanta ee loo eego mushaharkii hore* 10

Hawlgabyada 10
- *Hawlgabka qaranka* 11
- *Hawlgabka shaqada* 11

Kaalmada gaarka ah ee qofka waddanka u soo guurey 11
Lacagta caawimada nolosha 11
Jagada iyo xuquuqda qofka macaamiisha ka ah daryeelka arrimaha bulshada 11
Wakiilka arrimaha bulshada (Sosiaaliasiamies) 12

4. FASAXYADA QOYSKA **12**

Fasaxa hooyanimada 12
Fasaxa aabbanimada 12
Fasaxa waalidnimada 13
Fasaxa haynta ilmaha 13
Lacagta carruurta 13
Caawimada hooyanimada (Äitiysavustus) 13

5. XANNAANADA CARRUURTA IYO BARBAARINTA BILOWGA AH **14**

Xannaano mise qoys ilmaha guryaha ku xanaaneeya? 14
Jardiinooyinka carruurtu ku ciyaarto 14
Xannaanooyinka furan 14
Xannaaneynta ilmaha marka qofka waddanka u soo guurey waxbaranayo 14
Codsashada xannaano maalmeedka 15
Kharashka xannaano maalmeedka 15
Waxbarashada hore ee ka horaysa iskuul bilaabidda 15
Waxqabadka hiwaayadda dhallinyarada 15

6. ISGUURSIGA IYO ISFURIDDA **15**

Caawimada masruufka (Elatusapu) 15
Kaalmada masruufka (Elatustuki) 16

7. AADIDDA ISKUULKA IYO WAXBARASHADA 16

DUGSIGA AASAASIGA AH 16
- *Cuntada* 16
- *Barashada diinta* 16

DUGSIYADA SARE IYO MACHADYADA FARSAMADA 17
WAXABARASHADA LA QABSASHADA WADDANKA 17
KULLIYADAHA, KULLIYADAHA XIRFADDAHA IYO JAAMACADAHA 18
MACHADKA SHACABKA 18
MACHADKA SHACABKA IYO MACHADKA WAXBARASHADAA DADKA WAAWEYN 18
LACAGTA WAXBARASHADA (OPINTOTUKI) 18
KAALMADA WAXBARASHADA (KOULUTUSTUKI) 18

8. DARYEELKA CAAFIMAADKA 18

XARUMAHA CAAFIMAADKA 18
RUGAHA DARYEELKA HOOYADA (ÄITIYSNEUVOLAT) 19
RUGAHA DARYEELKA CARRUURTA (LASTENNEUVOLA) 19
DARYEELKA CAAFIMAADKA DUGSIGA 20
DARYEELKA BUKAANKA 20
DARYEELKA CAAFIMAADKA EE BARAYFITKA AH 20
DAAWOOYINKA 20
XUQUUQDA QOFKA BUKAANKA AH 21

9. ADEEGYADA NAAFADA 21

KAALMADA KELADU SIISO NAAFADA IYO KUWA MUDDADA DHEER JIRRAN 21
- *Lacagta daryeelka gaarahaaneed ee la siiyo waalidka ilmaha* 21
- *Kaalmada daryeelka guriga ee ilmaha jirran ama naafada ah* 22
- *Kaalmada naafada* 22
- *Baxnaanin* 22

10. ADEEGYADA WAAYEELLADA 22

ADEEGYADA GURIGA 22
GURYAHA ADEEGGA IYO GURYAHA DADKA WAAWEYN 23

11. SIDEE LOO MAALGELIYA DARYEELKA BULSHADA? 23

12. XAGEE CAAWIMO LAGA HELAA HADDII XAALAD MUSHAAKIL AH LAGU JIRO? 23

LAMBARRO TELEFOON OO MUHIIM AH 23
MARKA XAALAD KHATAR AH AY JIRTO 24
CAAFIMAADKA MASKAXDA IYO ADEEGGA DHIBAATADA 24
XAFIISKA CAAFIMAADKA MASKAXDA IYO XARUMAHA LATALINTA QOYSKA 24
GURYAHA AMMAANKA 25
XARUMAHA BUKAAN SOCOD EEGTADA AALKOLIISTAYAASHA (A-KLINIKAT) 25
KAALMADA ARRIMAHA SHARCIGA 25
WAAXDA LA TALINTA QOXOOTIGA (PAKOLAISNEUVONTA) 26
QAREENNADA BARAYFITKA AH 26
BAADIGOOBKA CAALAMIGA AH EE DADKA LA LA' YAHAY 26
CINWAANNO FAA'IIDO LEH OO INTERNETKA AH: 26

Hordhac

Ku soo dhawaada Finland! Buuggan yar waxaa lagaga hadlayaa sida ay nolosha Finland tahay iyo sida wax looga qabsan karo, tusaalle ahaan xagga degenaanshaha iyo waxbarashada. Buuggan waxaa si kooban loogu soo bandhigayaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee adeegyada dowladda iyo kaalmooyinka arrimaha bulshada ee marxaladaha kala duduwan ee nolosha. Dadka waddanka u soo guurey waxaa loola jeedaa qaxootiga, soo guurayaalka, dadka waddanka dib ugu soo noqday iyo dadka kale ee ajnebiga ah. Qofka waddanka u soo guurey wuxuu helaa adeegyo iyo kaalmooyin arrimaha bulshada ah, kuwaas oo fududaynaya noloshiisa deegaankan ku cusub. Xuquuqda iyo waajibaadka qofka waddanka u soo guurey waxay ku xiran yihiin hadba meesha uu ka soo guurey, ma waddan Midowga Yurub ka tirsan buu ka soo guurey, mise waddan ka tirsan waddamada Dhaqaalaha Yurub, mise waddan kale. Adeegyada ujeeddadoodu waa, inuu qofka waddanka u soo guurey la qabsado nolosha Finland, uuna helo aqoon iyo xirfad, si uu waddankan isaga debero.

Arrimaha la xiriira shaqada iyo goobta shaqada waxaa kaa caawinaya xafiisyada shaqada (työvoimatoimistot). Xafiisyada shaqada waxaa kaloo laga helaa adeegyada shaqabixiyayaalka: www.mol.fi. Macluumaadka ku saabsan waddankaagan cusub waxaad ka heli kartaa www.suomi.fi

La qabsashada waddanka?
La qabsashada waddanka waxa loola jeedaa waa, inuu qofka waddanka u soo guurey helo macluumaadka iyo aqoonta ka caawinaysa sidii uu isaga deberi lahaa waddankan cusub ee uu ku nool yahay, iyo weliba si uu uga qaybqaato nolosha shaqada iyo waxqabadyada kale ee bulshada isagoo ah qof la siman dadka kale ee waddanka ku nool.

Si loogu sahlo inuu qofka waddanka u soo guurey bulshada Finnishka ugu dhex noolaado isagoo ah qof la siman waxaa la sameeyey sharciga la qabsashada waddanka (Sharcigu wuxuu dhaqangalay 1.5.1999). Qorshaha la qabsashada waddanka waxaa xaq u leh dadka waddanka u soo guurey ee Finland yimi wixii ka dambeeyey 1.5.1997, kuwaas oo si joogto ah waddanka Finland u deggan, shaqo la'aanna ah, waana inay ahaadaan dad shaqo raadsanaya ama qaata lacagta caawimada nolosha. Qorshaha la qabsashada waddanka waxaa la samayn karaa ugu badnaan saddex sannadood. Qorshaha waxaa lagu heshiinayaa tusaale ahaan, sidii uu qofka waddanka u soo guurey ku baran lahaa luuqadda Finnishka ama Iswiidhishka, uuna ku heli lahaa aqoonta aasaasiga ah ee bulshada Finnishka ah. Ujeeddada qorshaha la qabsashada waddanku waa in qofka loo fududeeyo sidii uu Finland ula qabsan lahaa.

Faahfaahin dheerad ah: www.mol.fi

Xaq u yeelashada kaalmooyinka bulshada (Oikeus sosiaaliturvaan)
Qofka Finland u soo guuraa wuxuu xaq u yeelanayaa kaalmooyinka bulshada oo ay sal u tahay deggenaanshihiisa Finland laga bilaabo markuu Finland yimaado, haddii ujeeddadiisu tahay inuu si joogto ah halkan u deggenaado, uuna haysto sharci uu hal sano waddanka ku joogi karo (haddii sharci noocaas ah looga baahan yahay).
U soo guuridda Finland waxaa loo arkaa inay joogto tahay,haddii qofku waddanka ugu soo guuro isagoo asalkiisu waddankan u dhashay, qaxootinimo ama qof qaxootinimo dalbaday loo ogolaado sharci uu waddanka ku joogo oo ugu yaraan hal sano ah. Deggenaanshaha waxaa loo arkaa inay joogto tahay, haddii soo guuridda ay sabab u yihiin arrimo qoyska dartiis ah

ama haddii qofku si joogto ah Finland uga shaqeeyo ama haddii uu ugu yaraan uu waddanka ka shaqaynayey laba sannadood uuna weli shaqeeyo.Qofka waddanka u soo guuray waxaa looga baahan yahay inuu run ahaantii waddanka ku nool yahay. Dadka Finland u yimaada inay muddo yar oo cayiman joogaan loona arko inay si joogto ah halkan u deggen yihiin. Dadka Finland ujeeddo waxbarasho oo keliya u yimaada looma arko inay joogto waddanka u deggen yihiin, sidaa darteed xaq uma laha taageerooyinka arrimaha bulshada ee Hay'adda Caymiska Caafimaadka Qaranku (Kela) bixiso.

Faahfaahin dheeraad ah: www.kela.fi

1. Finland ku ahaanshaha qof waddanka u soo guurey

Si yaabo badan ayaa loo horumariya, loona sahlaa siday dadka waddanka u soo guurey ula qabsan lahaayeen bulshada Finnishka ah. Finland waxaa ku yaalla 446 degmo. Qof walba oo Finland u soo guuraa degmo ayuu ka tirsan yahay. Degmadu waa deegaan ay samayso hal tuulo ama tuulooyin badan, waxaana lagu fuliyaa waxyaabaha dadka oo dhan ka dhexeeya. Magaalooyinka laftoodu waa degmooyin. Guud ahaan dhammaan dadka degmada ka tirsan waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah waajibaadka saaranna waa isku mid. Waxaa jira degmooyin badan oo leh waaxo iyo shaqaale ku takhasusay arrimaha dadka waddanka u soo guurey, iyaga ayaana laga helaa wixii talo iyo tilmaan ah. Waxaa jira magaalooyin badan oo leh goob caalami ah oo lagu kulmo, halkaas oo ay dadka waddanka u soo guurey iyo dadka Finnishka ahi isku bartaan, iskuna dhaafsadaan waayoaragnimada iyo hiwaayadaha.

Caawimada turjubaanidda waa la codsan karaa
Haddii aqoontaada luuqaddu aanay ku fillayn, inaad arrimahaaga ku dhammaysato, shaqaalaha maamulka ayaad weydiisan kartaa caawimaad turjubaanimo. In turjubaan loo baahan yahay waa in shaqaalaha maamulka hore loogu sii sheegaa. Shaqaalaha maamulka ayaa turjubaanka dalbaya. Waa muhiim inuu qofka macaamiisha ahi yimaado wakhtiga la ballamay. Caawimaadda turjubaanka xafiisyada shaqadana waa lagu heli karaa.
Shaqada turjubaanku waa turjumid oo keliya, macnaheeduna waa inuu hadalka luuqad ka turjumo oo luuqad kale u turjumo. Turjubaanka waxaa waajib ku ah in aanu cid kale u sheegin waxa lagu wada hadlay.

Barashada luuqadda
Barashada luuqadda waddanku waxay kaa caawinaysaa inaad waddanka la qabsatid, waxayna kuu fududaynaysaa sidii aad isaga deberi lahayd xaaladaha kala duwan ee nololmaalmeedka. Finland waxay leedahay laba luuqadood oo offishal ah, oo kala ah Finnish iyo Iswiidhish. Xagga nolosha shaqada luuqadda Finnishku waa lagama maarmaan.
Dadka waaweyn ee waddanka u soo guurey waxay luuqadda ka baran karaan xarumaha waxbarashada dadka waaweyn, dugsiyada sare ee dadka waaweyn, machadada qaranka iyo ku ururada shaqaalaha iyo sidoo kale xarumaha luuqadaha ee jaamacadaha iyo tacliinta sare. Xafiiska shaqada ayaad ka heleysaa wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan koorsooyinka luuqadda.

Waxaa kaloo macluumaadka laga helaa boggaga internetka ee machadada kala duwan ee waxbarashada iyo bogga internetka ee Gudoonka Waxbarashada www.oph.fi

Dumarka iyo ragguba way shaqeeyaan
Finland dumarka iyo raggu waxay leeyihiin fursad isku mid ah oo ay xirfad ku bartaan kuna shaqaystaan. Dumarku xitaa caadiyan waxay qabtaan shaqooyin mushahar lagu qaato. Haddii shaqo heliddu kugu adkaato, waxaa wanaagsan inaad soo ogaatid hawlaha dadka shaqa

la'aanta ah. Xafiisyada shaqada ayaa kaa caawinaya xagga raadinta shaqada iyo sidii aad waxbarsho ku dalban lahayd. Waxaad kaloo heleysaa macluumaadka ku saabsan sidii aad u furan lahayd ganacsi aad adigu laadahay. Sidii kale shaqbixiyayaalku danahooda way ka qabsan karaan xafiiska shaqada. Shuruudaha maalgelinta lagu siiyaa ganacsiga dadka waddanka u soo guurey waxay la mid yihiin shuruudaha dadka Finnishka ah ganacsigooda lagu maalgeliyo. Dowladda Finland waxay leedahay hay'ad maalgelin oo la yiraahdo Finnvera Oyj. Waxay horumarin ku samaysaa aasaasidda ganacsiyada iyadoo u ogolaanaysaa deebaajiyada caadiga ah iyo deebaajiga wax dhoofinta .

Faahfaahin dheeraad ah: www.finnvera.fi

Adeegyada xafiiska shaqada

Xafiisyada shaqadu waa hay'ado ay dowladda Finland maamusho, waxayna dadka ka caawiyaan tusaale ahaan shaqo raadinta iyo shaqaaloobidda, lacagta shaqo la'aanta, doorashada xirfada iyo qorshaynta xirfadda shaqada, iyo waxyaabaha la xiriira dalbashada waxbarashada iyo sidii ganacsade loo noqon lahaa. Qaar ka mid ah xafiisyada shaqada waxaa jooga shaqaale ku takhasusay arrimaha dadka waddanka u soo guurey. Sidoo kale xafiiska shaqada ayaad ka heleysaa macluumaadka ku saabsan ogolaanshaha sharciga lagu shaqaysto. Dhammaan adeegyada xafiiska shaqadu waa lacag la'aan.

Shaqobixiyayaalku boosaska shaqada ee bannaan intooda badan waxay u soo sheegaan xafiiska shaqada. Xafiiska shaqada mooyee waxaad shaqo ku raadsan kartaa siyaabo kale, shaqooyinka joornaallada lagu soo qoro ama adigoo toos ula xiriiraya shaqobixiyayaalka. Qaybta shaqo raadinta waxaad isticimaali kartaa adeegga la taliyaha xagga shaqada ama adaa iskaa u adeegan kara. Qofka shaqeeya iyo kan shaqo la'aanta ahiba waxay inay shaqo raadis yihiin iska soo qori karaan qaybta shaqo raadinta. Inuu qofku inuu shaqo raadis yahay isa soo qoro waa lagama maarmaan si uu u helo lacagta shaqo la'aanta. Qofka isa soo qoray inuu shaqo raadis yahay, wuxuu caawimo aqoonyahan oo raadinta shaqada ah ka helayaa qofka ah la taliyaha xagga shaqada. Haddii qofka shaqoraadiyaha ah rabo inuu kordhisto aqoontiisa shaqo dalbashada, wuxuu dalban karaa koorsooyinka dalbashada shaqada ee xafiiska shaqadu qabanqaadiyo.

Qofka shaqoraadiyaha ah waxaa kaloo caawiya laynka shaqada. Laynka shaqada waxaa la wici karaa Isniinta ilaa Jimcaha saacaddaha u dhexeeya 8.00 - 19.00, qiimaha telefoonkuna wuxuu waddanka oo dhan la mid yahay kan deegaankaaga (8.21 senti/telefoonkiiba + 1.47 senti/daqiiqaddii, telefoonka gacanta 29.26 senti/daqiiqaddii). Laynka shaqada shaqaalaha la talinta ee xafiiska shaqadu shakhsi ahaan ayey kuugu adeegayaan oo kuu tilmaamayaa lambarradayada u adeegidduna waa**:** 0203 66066, 0203 66022, 0203 66077 iyo 020360011.

Su'aalaha la xiriira u adeegidda xafiisyada shaqada iyo wasaaradda shaqada www.mol.fi waadna soo weydiin kartaa, xitaa e-mail ahaanna waad nagu soo weydiin kartaa tyolinja@mol.fi

Dad cusub iyo hab nololeed cusub

Habka ugu haboon ee waddankan aad deggan tahay ee cusub caadooyinkiisa nolosha ku baran kartaa waa adigoo aad isbarataan dadka kale. Dadka Finnishka ah waxaad isku baran kartaan barxadda guriga bannaankiisa iyo meelaha hiwaayadaha kala duduwan, oo ka mid yihiin naadiyada isboortiga iyo kooxaha wax wada barta ee machadada waxbarashada. Waxaa kaloo laga yaabaa in xaafadda aad deggen tahay ay ka jiraan waxqabadka saaxiibtinimada iyo kooxo hiwaayado leh oo ay uraro leeyiihiin. Hooyooyinka aabbayaasha waxaa qumman inay bilowga horeba ka qaybqaataan waxqabadyada loogu talagalay waalidiinta carruurtoodu dhigato xannaanooyinka iyo iskuullada.

Qoyska, qaraabada iyo saaxiibadu waa dadka uu qofka cusub ee waddanka u soo guurey ka heli karo taageerada ugu fiican ee uu ugu baahan yahay deeggaankan cusub ee uu soo deggey. Qofku markuu deggan yahay waddankiisa meel aan ahayn, wuxuu dareemayaa muhiimadda ay leeyihiin luuqaddiisa hooyo, caadooyinka nolosha ee dhaqankiisa cuntada iyo muusigga waddankiisa iyo la dhaqanka bulshada. Waxaa jira degmooyin badan oo ay ka jiraan jaalliyado iyo ururo saaxiibtinimo oo ay dadka waddanka u soo guurey leeyihiin.
Ururka Laynqarta cas ee Finland (Suomen Punainen Risti = SPR) ayaa haddii aad u baahato kaa caawinaya sidii aad ku heli lahayd qof ku taageera ama qoys saaxiib kuu noqda. Saaxiibada iyo qoysaska saaxiibadu waa dad raba inay bartaan dadka qaxootiga ah iyo dadka kale ee ajnebiga ahba, oo waxay rabaan inay dadkan cusub ka taageeraan siday waddankan cusub ugu bilaaban lahaayeen nolosha.

Faahfaahin dheeraad ah www.redcross.fi

2. Deegaanka iyo deggenaanshaha

Qof kasta oo waddanka u soo guurey, oo si joogto ah waddanka Finland u deggan, ka dib marka diiwaanka loo geliyo, inuu si joogto ah waddanka u deggan yahay ayuu wuxuu yeelanayaa degmo uu ka tirsan yahay. Sidaas darteed waa in xafiiska diiwaangelinta (maistraatti) loo sheegaa oo la wargaliyaa marka la guuro.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan is diiwaangelinta waxaad ka heleysaa xafiisyada diiwaangelinta, kuwaas oo sidii loola xiriiri lahaa aad ka heleysid buugga teleefoonada ee degmadaada meesha ay ku qoran tahay xafiiska diiwaangelinta (maistraatti).

Ogeysiinta inaad guurtey telefoon ayaad ku samayn kartaa 0203 456 456 (Finnish) ama 0203 457 457 (Iswiidhish) iyo internetka www.vaestorekisterikeskus.fi ama boostada www.posti.fi

Xuquuqda ay leeyihiin dadka degmada deggan
Qof kasta oo Finnish ah oo sideed iyo toban sano u buuxsantay, wuxuu xaq u leeyahay inuu doorashooyinka qaranka iyo kuwa dowliga ahba (valtiolliset vaalit ja kansanäänestykset) codkiisa bixiyo. Qof kasta oo Finnish ah iyo qof walba oo ajnebi ah oo waddanka si joogto ah ugu nool, oo sideed iyo toban sano u buuxsantay, wuxuu xaq u leeyahay, inuu wax doorto doorashooyinka degmooyinka iyo doorashooyinka degmooyinka ee dowliga ah.

Faahfaahin dheeraad ah: www.finlex.fi

Waddanka Finland doorasho guud ayaa lagu doortaa baarlamaanka, madaxweynaha jamhuuriyadda, xubnaha ay degmooynku wakiishaan (kuntien valtuustot) iyo xubnaha (16) baarlamaanka Yurub.

Faahfaahin dheeraad ah: www.suomi.fi

Deggenaanshaha – guri aad leedahay mise mid kiro ah
Dadka Finnishka ah intooda badani waxay deggen yihiin guryo ay iagu leeyihiin, si ay guri u iibsadaana waxay qaataan deyn. Sida caadiga ah deynka waxaa laga qaataa bangiga, deynkana waxaa laga bixiyaa dulsaar. Wakhtiga deynka iyo dib u bixintiisaba waxaa wanaagsan, inaad bangiyada ka dalbatid xaraash (tarjous).

- **Guriga kirada ah**

Shaqaalaha dowladda ayaa dadka qaxootiga ah iyo qaar ka mid ah dadka waddanka u soo guurey u qabanqaabiya guriga ugu horeeya ee ay deggaan. Ka dibse qof waliba isagaa iskiis u raadsada guri.

Guryaha waxaa kireeya dagmooyinka ka sokow shirkadaha caymiska, hay'adaha diinta iyo hay'ado kala duduwan oo danta guud ka shaqeeya. Guryaha ardaydana waxaa laga kireystaa Shirkadda Guryaha Ardayda. Waxaa kaloo si toos ah guryaha looga kireysan karaa qofka guriga leh ama qof dillaal u ah. Markaas waxaa dhacda in la bixiyo caddad lacag ah oo ah deebaaji ama lacagta hormarinta ijaarka. Markaad guri cusub u soo guurto, waxaa fiican in aad horay ka barato sharciyada u deggan guryaha. Sharciyada waxaa ku qoran xeerarka iyo nidaamyada guud ee guryahaas u degsan.

- **Heshiiska kirada**

Qofka guriga kiraysanayaa wuxuu heshiiska kirada la gelayaa qofka guriga iska leh. Heshiiskaas waxaa lagu qeexayaa qiimaha kirada iyo sida kirada loo bixinayo. Sida caadiga ah kirada waxaa horey loo bixiyaa bisha bilowgeeda. Waxaa kaloo heshiiska lagu qoraa muddada uu qofku guriga kiro ahaan ugu jiri karo. Heshiiska waxaa kaloo laga dhigi karaa inuu noqdo mid wakhti uu dhammaanayo aan lahayn oo joogto ah. Hadii aan kirada wakhtigeeda lagu bixin ama qaabka uu qofka guriga kiraystay guriga ugu nool yahay tahay mid dhibaato leh, markaas qofka guriga laga kiraystay wuu ka bixi karaa heshiiskii kirada. Markaas waxay noqonaysaa, in qofka guriga kirada ugu jirey uu guriga ka guuro. Heshiiska kirada si dhakhso ah xitaa waa loo baabi'in karaa. Sharciga kiraynta guryaha ayaa lagu caddeeyey arrimaha ku saabsan kiraynta guryaha. Haddii ay timaado dhibaato, degmada xafiiskeeda u qaabilsan caawinta arrimaha sharciga (oikeusaputoimisto) ayaa caawimo xagga sharciga ah laga heli karaa.

3. Daryeelka bulshada ee deggenaanshaha ku salaysan iyo kuwa kale

Daryeelka arrimaha bulshada ee sharciga ku salaysan ee waddanka Finland waxay u kala baxaan kuwo deggenaanshaha waddanka ku salaysan iyo kuwo shaqaynta ku salaysan.
Daryeelka arrimaha bulshada ee deggenaanshaha waddanka ku salaysani waa caddadka ugu yar ee lacagaha hawlgabka iyo lacagta caawimada nolosha ee la siiyo qofku markuu jirrado ama shaqa la'aan noqdo, iyo kaalmada qoysaska la siiyo kharashka carruurta kaga baxa awgeed. Daryeelka arrimaha bulshada ee Finland, intooda badani waxay ku salaysan yihiin deggenaanshaha waddanka: kaalmooyinkana waxaa la siiyaa caadiyan dadka Finland gudeheeda ku nool. Dhammaan ahaan daryeelka arrimaha bulshada ee deggenaanshaha waddanka ku salaysan waaa kuwa ay Keladu u xilsaaran tahay, adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka ee degmooyinka qabanqaabiyaan, kaalmada shaqa la'aanta ee qasnadaha shaqa la'aantu bixiyaan iyo caymiska caafimaadka ee ay u xilsaaran yihiin qasnadaha goobaha shaqada.

Xuquuqda helidda daryeelka arrimaha bulshada wuxuu qofku ku helöi karaa iyagoo ku salaysan heshiisyada caalamiga ah iyo go'aamada la is faro. Kuwaasina waxay yihiin sharcida u degsan Ururka Bulshooyinka Yurub iyo heshiisyada daryeelka arrimaha bulshada. Marka sharciyada caalamiga ah ee daryeelka arrimaha bulshada la adeegsanayo waxaa inta badan la tixgeliyaa, meesha uu qofku ka shaqeeyo – lama fiiriyo meesha uu deggan yahay. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada daryeelka arrimaha bulshada ee Ururka Bulshooyinka Yurub (EY) iyo siday saamayn ugu yeeshaan daryeelka arrimaha bulshada waxaa su'aali kartaa xafiisyada Kelada.

Daryeelka arrimaha bulshada ee Keladu qaabilsan tahay, waxaa qofka loo arkaa inuu Finland ku nool yahay, haddii uu waddanka ku leeyahay guri caadi ah, uuna si joogto ah oo xaqiiq ah waddanka u joogo.

Si qofka loo geliyo daryeelka arrimaha bulshada ee deggenaanshaha waddanka ku salaysan waa, in Kelada lagaga codsadaa foomka Y77. Codsiga waxaa la geeyaa xafiiska Kelada ee degmada uu qofka codsadaha ahi deggan yahay. Codsaduhu Kelada ayuu ka heleyaa go'aan uu abiil ka qaadan karo oo qoraal ah. Haddii go'aanku ogolaansho yahay, codsadaha waxaa loo soo dirayaa kaarka Kelada. Kaalmooyinka mid midka ah foom gaar ah ayaa lagu codsadaa.

Haddii qofka loo arko inuu si joogto ah waddanka Finland u deggan yahay, wuxuu xaq u leeyahay inuu dalbado kaalmooyinkan soo cosda ee Keladu ay bixiso, sida ay dadka kale ee waddanka deggeniba xaqa ugu leeyihiin:

- lacagta carruurta
- caawimada hooyonimada
- lacag maalmeedka bukaansocodka
- lacag maalmeedka waalidnimada
- megidda kharashka bukaanka ku baxa ee caymiska caafimaadka
- lacag maalmeedka shaqo la'aanta iyo lacagta kaalmada ah ee shaqo la'aanta
- kaalmada daryeelka ilamaha
- kaalmada naafada
- baxnaaninta ay Keladu qabanqaabiso iyo lacagta baxnaaninta
- hawlgabka qaranka iyo hawlgabka qoyska
- kaalmada kirada ee dadka hawlgabka qaata iyo kaalmada guud ee kirada
- lacagta kaalmada ilamaha guriga lagu hayo iyo tan ilmaha xannaanada barayfitka ah lagu hayo
- lacagta safarka dugsiga

Faahfaahin dheeraad ah: www.kela.fi

Daryeelka bulshada ee shaqaynta ku salaysani waa lacagta hawlgabka ee loo eego mushaarkii hore, caymiska shilalka iyo weliba caymiska badbaadada loogu talagalay shilka shaqadu keento iyo cudurrada shaqadu sababto. Daryeelka bulshada ee shaqaynta ku xiran waxaa u xilsaaran shirkadaha caymiska ee barayfitka ah iyo Xarunta Badbaadada Hawlgabka.

Kaalmooyinka Kelada

Dhammaan dadka sida joogtada ah Finland ugu nool waxay ku jiraan caymiska caafimaadka ee sharciga ah. Sabatan darteed ayey Kela u magtaa qayb ka mid ah kharshyada ku baxa dhakhaatiirta barayfitka ah, baaritaanada barayfitka ah iyo daryeelka isbitaalada iyo xarumaha daaweynta ee barayfitka iyo weliba kharashka daawooyinka. Waxaa kaloo jirta, in nidaamkan caymiska caafimaadka dartiis uu qofku xaq u yeelan karo lacag maalmeedka bukaansocodka, lacagta hooyanimada iyo lacagta aabbanimada iyo tan waalidnimada.

- **Lacag maalmeedka bukaansocodka**

  Hadii takhtarku caddeeyo, in qof (16-64 jir ah) oo isla markaana shaqaale ah uusan muddo dheer awoodi doonin in uu shaqeeyo, waxaa qofkaas la siinayaa muddada uu buko lacag maalmeedka bukaansocodka**.** Wakhtiga sugidda ee aan qofka lacag la siineyn waa qiyaastii ilaa laba toddobaad (maalinta uu jirrado iyo sagaalka maalmood ee shaqo jirto ee ku xiga). Sida loo xisaabinayo caddadka lacag maalmeedka bukakaansocodku waxay ku xiran tahay dakhliga mushaharka qofka inta uu le'eg yahay, canshuur ayaana lacagta laga bixiyaa. Lacag maalmeedkaan waxaa qofka la siiyaa ugu badnaan 300 oo maalmood.

Haddii qofka bukaanka ah uusan hore u laheyn wax dakhli mushahar ah ama haddii dakhliga soo galaa uu aad u yar yahay, waxaa qofkaas la siin karaa caddadka ugu yar ee lacag maalmeedka, waa haddii xanuunku uu socdo muddo 55 maalmood ka badan.

- **Megidda daawooyinka**

Daawooyinka waxaa iibiya farmashiyada. Dawooyinka qaarkood waxaa loo baahan yahay, inay ku qoran yihiin warqad rijeeto ah oo uu dhakhtar soo qoray, qaarkoodna uma baahna. Caymiska caafimaadka (jirrada) oo ah Kelada ayaa bixisa qayb ka mid ah kharashka daawooyinka uu dhakhtarku soo qoro. Dawooyinka loo isticimaalo daaweynta cudurrada daran qaarkood qiimahooda inta badan qofka waa laga bixiyaa.

- **Kaalmada kirada**

Dadka dakhligoodu yar yahay waxay Keladu siisaa lacag kaalmada kirada ah, caddadka kaalmada kirada waxaa saameeya tirada dadka qoyska, dakhliga qoyska soo gala iyo kharashka kirada kaga baxa iyo gurigu intuu le'eg yahay. Dadka hawlgabka ahi waxay leeyihiin kaalmada kirada oo u gaar ah, ardayduna waxay heli karaan kororsiimada guriga (asumislisä). Ardayga xaaladdiisa deegaanka iyo xiriirka qoyska ayaa saameyn ku yeelan kara, inuu ardaygu heli karo kororsiimada guriga ama kaalmada kirada ee guud.

Daryeelka caafimaadka shaqaalaha

shaqobixiyayaalka ayaa shaqaalahooda u abaabula adeegga daryeelka caafimaadka. Faahfaahin ku saabsan daryeelka caafimaadka shaqaalaha waxaad ka heleysaa goobtaada shaqada.

Caymiska shilalka

Dhammaan shaqo bixiyayaashu waxay ku khasban yihiin, in ay shaqaalohooda geliyaan caymiska shilalka. Caymiskani wuxuu bixiyaa dakhliga qofka shaqaalaha ah ka baaqda ee ay sababta u yihiin shil shaqada ku soogaarey ama cudurada shaqadani leedahay, wuxuu kaloo bixiyaa kharashka daryeelka iyo waxyaabaha kale ee kala duduwan ku baxa. Hadii ay geeri dhacdo waxaa reerka uu ka dhashay qofka dhintay la siinayaa lacag la yiraahdo hawlgabka reeka iyo caawimo ah kharashka ku baxa aasidda ama duugista.

Kaalmooyinka shaqo la'aanta

Haddii aad shaqo la'aan noqoto ama waxbarashadu kuu dhammaato, welina aadan shaqo helin, waa inaad markiiba xafiiska shaqada iska xaadirisaa, una sheegtaa inaad shaqo raadis tahay. Si aad u hesho lacagta shaqo la'aanta waa, inaad ku jirtaa diwaanka xafiiska shaqada. Wakhtiga shaqo la'aanta ee aan lacagta shaqo la'aanta la bixinin (omavastuuaika) wuxuu caadiyanka bilaamaa, markuu qofku xafiiska shaqada shaqo raadis inuu yahay u sheego. Kela-du waxay bixisaa lacagta shaqo la'aanta ee aasaasiga ah.lacagta shaqo la'aanta ee mushaharka ku salaysan waxaa qofka siiya qasnadda shaqa la'aanta (työttömyyskassa) ee uu xubinta ka yahay.

- **Lacag maalmeedka shaqo la'aanta**

Qofka shaqo la'aanta ah ee shaqo dalbaday wuxuu Kela-da ka heli karaa lacagta shaqo la'aanta ee aasaasiga ah, haddii labadii sano iyo afartii bilood (28 bilood) ee ugu dambeeyey uu ugu yaraan toban bilood soo qabtay shaqo mushahar uu ku qaadanayey, ama uu ganacsade ahaa labo sano oo ka mid ah afartii sano ee markuu shaqo la'aanta noqday ka horeeyey. Qofku waa inuu ahaadaa mid codsnaya shaqo maalintii oo dhan ah, da'diisuna tahay 17 – 64 sano, awoodana inuu shaqeeyo. Waana inuu qofku xafiiska shaqada iska diwaan geliyey inuu shaqo raadis yahay. Lacagta shaqo la'aanta waxaa la bixiyaa ugu badnaan 500 maalmood. Caddadka lacag maalmeedku dadka la siiyo oo dhan way isle'eg tahay, canshuur ayaana laga gooyaa.

- **Lacagta kaalmada shaqo la'aanta**

Qofka waddanka u soo guurey lacagta kaalmada shaqa la'aanta saddexda sano ee ugu horeeya ee waddanka uu joogo waxaa la siiyaa, iyadoo ah lacagta kaalmada la qabsashada waddanka. Si uu qofku u helo kaalmada la qabsashada waddanka waxaa shuruud u ah, in qofka waddanka u soo guurey uu xafiiska shaqada iyo xafiiska arrimaha bulshada ee degmada si wadajir ah ula sameeyey qorshaha la qabsashada wadanka. Marka qofka shaqa la'aanta ah aan la siinin lacag maalmeedka shaqa la'aanta ee mushaharkiisii hore loo eegeyey ama haddii qofka shaqa la'aanta ahi aanu xaq u lahayn lacag maalmeedka shaqa la'aanta, Kelada ayaa waxay siin kartaa lacagta kaalmada shaqa la'aanta. Qofku waa inuu noqdaa qof shaqa la'aan ah oo shaqo maalintii oo dhan raadinaya, da'diisuna ahaataa 17-64 sano, waana inuu awoodaa inuu shaqeeyo. Xafiiska shaqadana waa inuu iska soo diwaangeliyey inuu shaqo la'aan yahay oo uu shaqo raadinayo. Qofka da'diisu 25 sano ka yar tahay ee shaqa la'aanta ah ee shaqo raadinaya waxaa shuruud looga dhigaa helitaanka kaalmadan waxaa ka mid ah, waa inuu leedayahay xirfad waxbarashoo uu ku shaqaysan karo, waana in aanu diidin shaqo ama waxbarasho. Lacagta kaalmada shaqa la'aantu ma laha wakhti go'an oo ugu badnaan la bixiyaa, dhakhliga xaaska/ninka soo galaa waxay keeni karaan inay yaraato ama aan lagu siinba. Kaalmadan canshuur ayaa laga bixiyaa.

- **Lacag maalmeedka shaqo la'aanta ee loo eego mushaharkii hore**

Ururada shaqaalaha khasnadohooda shaqo la'aantu waxay siiyaan qofka ururka ka tirsan oo ay shaqo la'aan qabsato lacag maalmeed. Lacagta caddadkeedu waxay ku xiran tahay mushaharka uu qofku qaadan jirey intuusan shaqa la'aanta noqonin ka hor, sida caadiga ahna lacagtani way ka badan tahay lacagta shaqa la'aanta ee ay Keladu bixiso. Lacagtan waxay soconaysaa mudo qiyaastii labo sano ah. Shuruudaha lagu helo tan ugu weyni waa, inuu qofka shaqaalaha ahi ururka shaqaalaha ka tirsanaa ugu yaraan toban bilood, uuna bixin jirey lacagta ururka loo shubo. Sidaas daraadeed waxaa muhiim ah in qofku markuu shaqo helo, isla markiiba horey ka ogaado ururka shaqaalaha ee uu xubin ka noqon karo.

Hawlgabyada

Waddanka Finland dadka waayeelka ah dakhliga noloshooda waxaa lagu sugaa lacagta hawlgabka shacabka iyo tan hawlgabka shaqada. Qofka ajnebiga ahi, inuu helo xuquuda lacagta hawlgabka, waxay ku xiray tahay muddada uu qofku waddanka Finland ku noolaa ama uu uu waddankan ka shaqaynayey inta ay le'eg tahay. Xafiiska Kelada ayaad weydiin kartaa, in qof waayeel ah ama naafo ah oo qoyskaaga ka tirsani uu heli karo lacagta hawlgabka iyo lacagtaas hawlgabku intay dhan tahay. Hadii lacag hawlgabka aan loo ogolaannin, waayeelku wuxuu magaalada ka codsan karaa lacagta caawimada nolosha. Dhamaan lacagaha hawlgabka waxaa laga bixiyaa canshuur. Sida caadiga ahse qofka hawlgabka qaranka oo keliya qaataa canshuur ma bixiyo. Noocyada hawlgabyada ugu muhiimsani waa hawlgabka qaranka iyo hawlgabka shaqada. Kuwaas mooyee, waxaa kaloo jira hawlgabyo kale oo la bixiyo iyagoo shuruudo gaar ah ku xiran, hawlgabyadaas waxaa ka mid ah hawlgabka qoyska iyo hawlgabka shaqo la'aanta. Keladu waxay bixisaa hawlgabka qaranka, hawlgabka ku salaysan muddada uu qofku shaqaynayey waxaa bixiyaha hay'adaha hawlgabka shaqada (työeläkelaitokset). Hawlgabka awood la'aanta shaqada waxaa la siiyaa qofka da'diisu ka yar tahay 65 sano, haddii aanu cudur ama naafo darteed awoodin inuu shaqadiisii ama shaqo u dhiganta qabto. Hawlgabka waxaa caadiyan la bixiyaa, markay lacagta bukaansocodku joogsato, waana qiyaastii sannad ka dib marka uu qofku noqdo mid aan awoodin inuu shaqeeyo. Qofka hawlgabka ah wuxuu sidoo kale heli karaa kaalmada kirada, taas oo caddadkeedu ku xiran yahay dhammaan dakhliga qofka soo gala iyo kharashka ku baxa kirada. Waxaa kaloo sii dheer oo la siin karaa qofka hawlgabka ah kaalmada daryeelka. Taas oo loogu talagalay in lagu caawiyo hawlgabka xanuunsan ama naafada ah,

sidii uu gurigiisa ugu noolaan lahaa looguna daryeeli lahaa. Lacagta kaalmada kirada iyo tan daryeelka canshuur lagama gooyo.

- **Hawlgabka qaranka**

  Ajnebiga Finland si joogta ah ugu nool waxay helaan lacagta hawlgabka qaranka, hadii ay ugu yaraan muddo cayiman ku noolaayeen Finland (muddada ugu dheer ee shuruudda ah waa 5 sano). Caddadka lacagta hawlgabka qaranku wuxuu ku xiran yahay lacagaha hawlgabyada kale iyo muddada uu qofku ku noolaa Finland. Caddada lacagta waxaa kaloo saameyn ku yeelan kara degmada uu qofku deggen yahay iyo xiriirka reerka.

- **Hawlgabka shaqada**

  Qofka isagoo shaqeeya gaara da'da hawlgabka wuxuu helayaa lacagta hawlgabka shaqada. Caddadka lacagtu waxay ku xiran tahay muddada uu qofku shaqaynayey iyo inta mushaharkiisu uu le'ekaa. Sannad walba oo uu qofku shaqeeyo caddad go'an oo lacagta hawlgabka shaqada ah ayaa u ururta. Shaqabixiyahana waxaa waajib ku ah, inuu ka taxadero bixinta lacagta hawlgabka shaqada ee sharciga ku salaysan, lacagtaas qayb ka mid ah waxaa bixiya shaqabixiyaha qaybta kalena qofka shaqaalaha ah mushaharkiisa ayaa si toos ah looga gooyaa.

Kaalmada gaarka ah ee qofka waddanka u soo guurey

Sannadka 2003 bishiisa Oktoobar bilowgeeda laga bilaabo waxaa dhaqangeleya kaalmo dhaqaale oo cusub, taas oo loogu talagalay, in lagu sugo inay kaalmo dhaqaale oo ay ku noolaadaan helaan, dadka waddanka u soo guurey ee hawlgabka ah ama aan awoodin inay shaqeeyaan ee Finland ku nool. Kuwaas oo haddii kale muddo dheer u baahnaanaya lacagta caawimada nolosha ee degmadu bixiso. Kaalmadan gaarka ah ee hadda la aqbalay cidda ugu badan ee ay saamaysaa waa dadka asalkuudu Finnishka ka soo jeedo (inkerinsuomalaiset paluumuuttajat) ee waddanka ku soo noqday. Kaalmadan gaarka ahi waa nooc ah daryeelka arrimaha bulshada oo caawimo ah, kuna xiran ka fekeridda baahida jirta. Si uu qofku kaalmadan u helo waa inuu ugu yaraan jiraa 65 sano ama aanu awoodin inuu shaqeeyo. Waxaa kaloo intaa dheer, inuu qofku Finland ugu noolaa ugu yaraan shan sano oo xiriir ah, intaan kaalmadu u bilaaban ka hor. Kaalmada gaarka ahi caddadkeedu ugu badnaan wuxuu le'eg yahay lacagta hawlgabka qaranka ee buuxa, canshuurna lagama bixiyo. Caddadka kaalmada waxaa saameeya dakhliga codsadaha, dakhliga xaaskiisa/ninkeeda iyo hantidiisa iyo hantida qofka ay isqabaan. Lacagtan bixinteeda waxaa u xilsaaran Hay'adda Daryeelka Hawlgabka Qaranka.

Faahfaahin dheeraad ah: www.kela.fi

Lacagta caawimada nolosha

Lacagta caawimada noloshu waa shay ka mid ah badbaadada bulshada, waana kaalmada dhaqaale ee qofka la siiyo marka aanu meel kale waxba ka helin. Ujeeddadeeduna waa in qofka loo suurageliyo inuu helo dhaqaale uu ku noolaado, isla markaasna ay caawiso isku filaanshaha qofka. Lacagta caawimada nolosha wuxuu qofku xaq u yeelanayaa, haddii mushaharka shaqadiisa ama waxyaabaha kale ee caawimada daryeelka bulshadu aanay ku fillayn noloshiisa. Caddadka lacagta caawimada noloshu waxay ku xiran tahay dhaqaalaha iyo hantida qofku uu haysto. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa xafiiska sooshalka.

Jagada iyo xuquuqda qofka macaamiisha ka ah daryeelka arrimaha bulshada

Qofka macaamiisha ahi wuxuu xaq u leeyahay daryeel fiican oo arrimaha bulshada ah iyo in si fiican loola dhaqmo, iyadoo aan la cunsuriyadeyneyn. Sharciga macaamiisha daryeelka arrimaha bulshadu wuxuu saameeyaa dhammaan daryeelka bulshada oo dhan. Sida caadiga ah

qofka macaamiisha ahi wuxuu xaq u leeyahay, inuu ogaado dhammaan waxyaabaha isaga ku saabsan. Laakiin isagana waxaa waajib ku ah, inuu wararka isaga ku saabsan u sheego shaqaalaha maamulka. Shaqaalaha waxaa waajib ku ah, inay sirta xafidaan. Taasna macnaheedu waa in waxyaabaha kalsooni ahaanta uu qofku ugu sheegay aan loo sheegi kari cid aan shaqo ku lahay, xitaa ehelka looma sheegayo.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa xafiiska sooshalka iyo qoraalka magaciisu yahay Jagada iyo xuquuqda qofka macaamiisha ka ah daryeelka arrimaha bulshada (Sosiaalihuollon asiakkaan asema ja oikeudet**)**. Qoraalkaas waxaa laga helaa xafiiska sooshalka. Wuxuu kaloo ku jiraa internetka www.stm.fi. Qoraalkan waxaa loo turjumey af Iswiidhish, Jarmal, Ruush, Ingiriis iyo Soomaali. Wuxuu kaloo jiraa isagoo ku qoran Finnish iyo Iswiidhish sahlan.

Wakiilka arrimaha bulshada (Sosiaaliasiamies)
Degmo waliba waxay leedahay wakiil u xilsaaran arrimaha bulshada. Haddii qofka macaamiisha ahi aanu ku qancin sida loogu adeegay ama sida loola dhaqmay, wuxuu la xiriiri karaa wakiilka arrimaha bulshada.
Wakiilka arrimaha bulshadu wuxuu la taliyaa oo caawiyaa dadka macaamiisha ah ee daryeelka arrimaha bulshada. Wuxuu dadka u sheegaa xuquuqda qofka macaamiisha ah, wuxuuna la socdaa sida degmadu ula dhaqanto dadka macaamiisha ah. Xafiiska sooshalka ee degmadaada ayaa kuu sheegaya, sidii aad ula xiriiri lahayd wakiilka arrimaha bulshada.

4. Fasaxyada qoyska

Dhalashada iyo haynta ilmaha awgood waalidku waxay xaq u leeyihiin fasaxyada qoyska, kuwaas oo ah fasaxa hooyanimada, fasaxa aabbanimada, fasaxa waalidnimada (sidoo kale isagoo qayb ah) iyo fasaxa haynta ilmaha (sidoo kale isagoo ku melgaar ah ama qayb ah). Wakhtiyada lagu jiro fasaxa hooyada, kan aabbaha iyo kan waalidka Kela-da ayaa waxay bixisaa lacagta waalidnimada, taas oo caddadka ay tahay uu ku xiran yahay dakhliga waalidka. Waalidka aan shaqaynin waxaa la siiyaa caddadka lacag maalmeedka ee ugu yar oo ah maalin walba oo shaqo jirto. Wakhtiga lagu jiro fasaxa haynta ilmaha waxaa la qoyska la siiyaa lacagta kaalmada haynta ilmaha. Lacagta waalidnimada iyo lacagta kaalmada haynta ilmuhuba waa dakhli la canshuuro.

Fasaxa hooyanimada
Fasaxa hooyanimadu wuxuu bilowdaa qiyaas ahaan hal bil ka hor wakhtiga lagu qiyaasay inuu ilmuhu dhalanayo. Caddadka fasaxu waa 105 oo maalin shaqo ah. Wakhtiga lagu jiro fasaxa hooyanimada Kela-da ayaa hooyada siisa lacagta hooyanimada, haddii ay hooyadu deggenayd Finland ugu yaraan 180 maalmood oo ah ka hor wakhtiga la qiyaasay inuu ilmuhu dhasho.

Fasaxa aabbanimada
Muddada lagu jiro xilliga lacagta hooyanimada iyo lacagta waalidnimada aabbuhu wuxuu xaq u leeyahay fasaxa aabbanimada oo 18 maalmood dhan. fasaxan 18 maalmood ah waxaa loo qaadan karaa ugu badnaa afar qaybood. Waxaa kale oo intaa dheer oo uu aabbuhu heleyaa 1 - 12 maalmood oo dheeraad ah oo ah fasaxa aabbanimada, haddii uu qaato fasaxa waalidnimada oo ah ugu yaraan 12 maalmood oo ah dhammaadka xilliga lacagta waalidnimada. Markaas oo ay hooyadu shaqadeedii ku noqonayso ama ay qaadanayso fasaxeeda sannadka. Xilliga fasaxa aabbanimada Kela-da ayaa waxay aabbaha siinaysaa lacagta aabbanimada, waa haddii uu aabbuhu shaqada ka maqan yahay oo uu ilmaha hayo.

Fasaxa waalidnimada

Fasaxa waalidnimadu wuxuu bilaamaa isla marka uu fasaxa hooyanimadu dhammaado ka dib, waana 158 maalmood oo ah maalmaha shaqada. Xilliga fasaxa waalidnimada aabbaha ama hooyada ayaa la siiyaa lacagta waalidnimada. Waalidku iyagaa dhexdooda ka heshiinaya, kooda ilmaha guriga ku haynaya. Xilliga lacagta waalidnimada waalidku fasaxa way qaybsan karaan. Sidoo kale fasaxa waalidnimada qaybqayb ayaa loo qaadan karaa, markaas hooyada iyo aabbuhu midkoodba mar ayuu ilmaha guriga ku haynayaa, wuxuuna shaqayn karaa maalin barkeed. Tusaale ahaan labada waalid midkood ayaa ilmaha gelinka hore haynaya, midka kalena gelinka dambe ayuu haynayaa ama haynta ilmaha iyo shaqada waxaa loo qaybsan karaa maalin dhaaf ama toddobaad dhaaf. Aabbaha iyo hooyadu shaqabixiyahooda ayey kala heshiinayaan, inay maalin barkeed shaqaynayaan. Heshiiska ah in maalin barkeed la shaqaynayo waa inuu halkii marba noqdaa ugu yaraan laba bilood.

Fasaxa haynta ilmaha

Ilmaha 3 sano ka yar waalidkiisu wuxuu xaq u leeyahay, inuu qaato fasax si uu ilmihiisa guriga ugu haysto, iyada oo heshiiskiisa shaqadu sidiisii ugu sii soconayo. Wuxuuna xaq u leeyahay, inuu shaqadiisa dib ugu soo noqdo, iyadoo aan shuruudaha shaqada waxba iska beddeleynin. Fasaxa haynta ilmaha waxay waalidku qaadan karaan marka ay dhammaadaan fasaxa waalidnimada iyo kan aabbanimada ee kordhistay, fasaxuna wuxuu ku eg yahay ilaa inta uu ilmaha ugu yari ka gaadhayo saddex sano. Xilliga fasaxa haynta ilmaha Kela-da ayaa waxay bixisaa lacagta haynta ilmaha (kotihoidon tuki).

Fasaxa haynta ilmaha ah ee aan dhammaystirnayn wuxuu waalidku qaadan karaa ilaa dhammaadka sannadka uu ilmuhu dugsiga hoose/dhexe bilaabayo. Fasaxa haynta ilmaha ee aan dhammaystirnayn waalidku wuxuu si ku meelgaar ah ugu wareegayaa, inuu maalin barkeed shaqeeyo. Xilliga fasaxa haynta ilmaha ee aan dhammaystirnayn waxaa waalidka la siiyaa lacagta haynta ilmaha oo aan dhammaystirnayn.

Haddii ilmo da'diisu ka yar tahay 10 sano uu si degdeg ah u jirrado, aabbaha ama hooyadu waxay xaq u leedahay inay si ku meelgaar ah u qaadato fasaxa haynta ilmaha oo ah ugu badnaan afar maalmood oo shaqo jirto. Xuquuqda fasaxa haynta ilmaha jirran waxaa shardi u ah, in labada waalidba ay shaqeeyaan.

Lacagta carruurta

Lacagta carruurta waxaa la siiyaa waalidka ilmo walba oo Finland deggan oo 17 sano ka yar. Caddadka lacagta carruurtu waxay ku xiran tahay tirada ilmaha. Waalidka keligiis ilmaha haya waxaa ilmo walba lagu siiyaa lacagta carruurta ee la kordhiyey. Lacagta carruurta canshuur lagama bixiyo. Lacagta carruurta waxaa laga codsadaa Kela-da.

Caawimada hooyanimada (Äitiysavustus)

Hooyada uurka leh ee Finland deggan, marka wakhtiga ummushu soo dhawaado waxay xaq u leedahay caawimada hooyanimada. Si ay hooyadu u hesho caawimada hooyanimada waxaa shardi u ah, inay hooyadu tagtay meesha la talinta hooyada (neuvola) ama ay dhakhtarka rugta caafimaadka u tagtay, inta aanay dhammaan bisha afraad ee uurku. Caawimada hooyanimada waxaa loo qaadan karaa ama baakadda hooyanimada ama lacag ahaan, canshuurna lagama bixiyo. Hase ahaatee caawimada baakadda ah ayaa aad uga qiima badan lacagta caddaanka ah. Baakadda hooyanimada waxaa ku jira dharka carruurta oo tayadoodu aad u fiican tahay iyo qalab kale oo loogu talagalay daryeelka ilmaha. Alaabtaasina waxay kaa caawinaysaa bilowga hore, sidii aad ilmaha si fiican ugu daryeeli lahayd.

5. Xannaanada carruurta iyo barbaarinta bilowga ah

Xannaano maalmeedka waxaa looga jeedaa, marka ilmaha lagu hayo meel aan gurigooda ahayn. Barbaarinta bilowga ahi waa haynta, barbaarinta iyo waxbarashada ilmaha lagu siiyo xannaanada. Ujeeddada xannaano maalmeedka iyo barbaarinta bilowga ahi waa in waalidka lagu taageero barbaarinta ilmaha iyo in si wadajir ah qoyska loola shaqeeyo xagga kor u qaadidda horumarka iyo koriinka ilmaha iyo xagga waxbarashadaba. Isla markaana ilmuhu wuxuu heleyaa carruur uu la ciyaaro, oo wuxuu baranayaa hab nololeedka dadka Finnishka ah iyo luuqada waddankaba. Xannaanada sidoo kale ilmaha waa lagu taageeraa dhaqankiisa luuqaddiisaba, sababtoo ah waa muhiim, inuu ilmuhu luuqaddiisa hooyo si fiican u yaqaanno. Waalidka mar walba way u furan tahay, inay shaqaalaha xannaanada kala sheekaystaa arrimaha ilmahooda ku saabsan, oo shaqaalaha way u sheegan karaan waxay jeclaan lahaayeenna.

Xannaano mise qoys ilmaha guryaha ku xanaaneeya?
Ilmaha aan da'da iskuulka gaarin degmada ayaa xannaano maalmeed u qabanqaabisa. Meesha ilmaha lagu hayaa caadiyan waa ama xannaano ama qof shaqaale ah oo ilmaha guriga ku haya. Xannaanada ilmuhu waa kooxkoox, shaqaaluhuna waa kuwo haynta ilmaha cilmi ahaan u soo bartay. Qoyska ilmaha guriga ku hayaa waa qof degmadu shaqaalaysay oo gurigiisa ku haya koox dhawr carruur ah ka kooban. Xannaanooyinka degmadu leedahay mooyee waxaa jira xannaanooyin barayfit ah oo carruurta loogu talagalay iyo qoysas ilmaha haya oo barayfit ah. Ilmuhu wuxuu xannaanada joogi karaa maalin buuxda ama maalin barkeed ama todobaadkii dhowr maalmood. Degmooyinka waaweyni waxay kaloo leeyihiin xannaanooyin afar iyo labaatanka saacba furan. Waxaana loogu talagalay carruurta waalidkood shaqeeyaan shaqada wakhtigeedu isbedbedello (vuorotyö).

Jardiinooyinka carruurtu ku ciyaarto
Xannaanada mooyee waxaa kaloo jiri kara jardiinooyin ay ilmuhu ku ciyaaraan oo ay degmadu ilaliso. Kuwaas oo la tegi karo iyadoo aan hore loo sii ogeysiin, waana lacag la'aan. Shaqaalaha meesha jooga ayaa barnaamij u sameeya carruurta. Carruurta ka yar 4 sano waxay u baahan yihiin inuu la socdo qof xannaaneeya. Qaar ka mid ah jardiinooyinka ciyaarta waxay leeyihiin dadka ilmaha ciyaarsiiya, kuwaas oo carruurta kaa hayn kara muddo go'an, laakiin waxay qaataan lacag.

Xannaanooyinka furan
Waxaa jira degmooyin badan oo leh xannaanooyin furan oo ay degmadu ilaaliso. Xannaanooyinkaasna sidoo kale waa la tegi karaa iyadoo aan ogaysiis la iska hormarin, waana lacag la'aan. Xannaanooyinka furan waalidiinta ayaa ka qaybqaata xannaaneynta ilmaha. Waxaadna ka heleysaa baraarujin iyo taagero ku saabsan xannaaneynta carruurta iyo inaad la kulanto waalidiinta kale.

Xannaaneynta ilmaha marka qofka waddanka u soo guurey waxbaranayo
Markay dagmadu soo qaadato dad qaxooti ah, waxay waalidiinta u qabanqaabisaa waxbarasho loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey oo hal sano qaadata. Wakhtiga waxbarashadu socoto degmadu waxay ilmaha aan gaarin da'da iskuulka u qabanqaabisaa xannaano maalmeed lagu hayo, taasoo hooyada ilmaha yar yar haysata u suuragalinaysa, inay waxbarato, si ay u barato luuqadda Finnishka iyo inay barato oo la qabsato bulshadan cusub, Xannaano maalmeedka carruurtu qofka qaxootiga ah waa u lacag la'aan, haddii uu ku jiro waxbarashada loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey.

Codsashada xannaano maalmeedka
Xannaanad waa in la dalbadaa wakhtiga loo baahan yahay afar bilood ka hor. Hadii aad shaqo ama waxbarasho heshid, xannaano maalmeedka carruurta waxaa laguugu diyaarin karaa si degdeg ah. Waxaase mar walba wanaagsan, inaad wakhti fiican la xiriirtid xafiiska sooshalka ee degmada ama xannaanada carruurta ee kuugu dhow. Halkaas ayaa laga ogaan karaa codsiga xannaano maalmeedyada iyo kala doorashada noocyada xannaano maalmeedka ee kala duduwan.

Kharashka xannaano maalmeedka
Kharashka xannaanadu wuxuu ku xiran yahay inta qof ee uu qoyku ka kooban yahay iyo dhaqaalaha qoyska soo gala. Bishiina hal mar ayaa la bixiyaa lacagta xannaanada.

Waxbarashada hore ee ka horaysa iskuul bilaabidda
Waxbarashada hore (esiopetus) waxaa loo qabanqaabiyaa inta aanay iskuulka bilaabin ka hor dhammaan carruurta da'doodu tahay 6 sano. Waxbarashada hore carruurtu waxay ku sii bartaan aqoonta iskuulka ugu baahan doonaan. Taas oo u sahlaysa bilaabidda iskuulka. Waxbarashadu waa lacag la'aan, waana ugu yaraan maalin barkeed, waxayna socotaa hal sano. Ka qaybqaadashada waxbarashada hore khasab ma aha, laakiin aad ayey u wanaagsan tahay. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan waxbarashada hore waxaad ka heleysaa xannaanooyinka ama iskuullada meesha aad deggan tahay ku yaalla.

Waxqabadka hiwaayadda dhallinyarada
Dhallinyaradu waxay heli karaan hiwaayado fara badan. Kuwaas oo ay qabanqaabiyaan ururada kala duduwan ee dhallinyarada, naadiyada isboortiga, ururrada bulshada, iskuulada iyo shirkadaha ganacsatada ah. Deegmooyin badan ayaa waxay leeyihiin meelo gaar ah ama guryaha dhallinyarada oo loogu talagalay dhallinyarada, meelahaasna waxaa lagu qabanqaabiyaa waxqabadyo badan oo kala duduwan sida hiwaayadaha farshaxanka iyo jimicsiga, naadiyada kombiyuutarka iyo tartanka baabuurta. Goobaha hiwaayadaha si caadi ahaan ah ayeydhallinyarada isku da'da ahi isugu baran karaan loogana kororsan karaa luuqadda Finnishka. Tusaale ahaan naadiyada isboortiga aad ayaa loo xiiseeyaa, waxqabadkoodana waxaa ka qeyb gala dad da'doodu kala duwan tahay. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan waxqabadka hiwaayadaha waxaad ka heleysaa xafiiska dhallinyarda ee degmadaada, wargeyska xaafadaada iyo abaabulayaasha wax qabadyadaas.

6. Isguursiga iyo isfuridda

Guurku waa heshiis aan khasab ahayn, oo laga noqon karo. Furiinku Finland ilaa xad wuu ku badan yahay. Furiinka waxaa lagu dalbadaa codsi la geeyo maxakamadda degmada uu qofku deggan yahay. Maxakamada degmadu ma buurto sabta ay laba qof isu furayaan iyo xiriirka labada qof ee kala tegeya ka dhexeeya. Qofka furiinka dalbaday waa loo ogolaan karaa, xitaa iyadoo kan kale diidan yahay oo aanu raalli ka ahayn furiinka. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa qoraalka Wasaaradda Shaqada, Xafiiska Wakiilka Jinsiyadaha Tirada yar iyo Guddiga Arrimaha Sinnaanta, qoraalkaas waxaa la yiraahdaa Ku sinnaanta Finland – aqoon loogu talagalay dumarka iyo ragga waddanka u soo guurey (Tasa-arvoisena Suomessa tietoa maahanmuuttajanaiselle ja –miehelle). Qoraalku internetkana wuu ku jiraa www.mol.fi/migration

Caawimada masruufka (Elatusapu)
Labada waalidba waxaa waajib ku ah inay xil iska saaraan masruufka ilmaha. Hadii ay waalidiintu isfuraan ama aysan wada noolayn, ilmuhu wuxuu xaq uleeyahay inuu ka helo labada waalid hadba midka uu la nool yahay maahane kan kale caawimaadda masruufka.

Ilmuhu wuxuu kaloo xaq u leeyahay inuu la kulmo labadiisa waalidba. Caawimada masruuska waxaa lagu go'aamin karaa heshiis ay waalidku ku samaynayaan xafiiska shaqaalaha arrimaha carruurta u xil saaran ee u shaqeeya waaxda arrimaha bulshada ee degmada. Mida kale ee suuragalka ahi waa in maxakamadda degmadu go'aan ka bixiso caawimada masruufka. Qiimaha caawimada masruufka la bixinayo waa mid ku xiran xaaladda dhaqaale ee labada waalidba iyo baahida masruufka ee ilmuhu u baahan yahay.

Kaalmada masruufka (Elatustuki)
Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu degmada ka helo kaalmada masruufka, haddii waalidkiis uu dayaco inuu bixiyo caawimada masruufka ee lagu dhaqngeliyey go'aan ay maxakamaddu gaartey ama heshiis ay waalidku galeen. Kaalmada masruufka waxaa laga dalbadaa xafiiska arrimaha bulshada ee degmada uu ilmuhu deggan yahay. Degmada ilmaha siisa kaalmada masruufka ayaa qofka masruufku waajibka ku yahay ka goosanaysa lacagta caawimada masruufka ee uu bixin waayey. Haddiise awood darada dhaqaale ee qofka masruufku waajibka ku yahay darteed lacagta caawimada masruufka ee la go'aamiyey ay ka yar tahay tan kaalmada masruufka, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay kaalmada masruufka oo buuxda. Qofka waajibka masruufku saaran yahayna lagama qaadayo lacagta kaalmada masruufka inta dheeraadka ku ah tan isaga lagu xukumay inuu bixiyo. Ilmaha nikaax la'aanta ku dhasha ee aabbihiis la xaqiijin lacagta kaalmada masruufka waa la siiyaa. Ilmaha la soo qaatay ee waalid keligiis ahi adhabshan ahaan u keensaday laftiisa waa la siiyaa kaalmada masruufka.

7. Aadidda iskuulka iyo waxbarashada

Ilma walba oo Finland ku nool waxbarashadu waajib ayey ku tahay. Xaqna wuxuu u leeyahay in uu helo waxbarashada aasaasiga ah oo lacag la'aan ah. Ilmuhu waxay sida caadiga ah iskuulka bilaabaan bilowga dayrta sannaddugsiyeedka ee sannadka ay 7 sano u buuxsamayso.Sida caadiga ahna ilmuhu waxay dhigtaa iskuulka gurigooda ugu dhow. Waalidkana waxaa wanaagsan inay la xiriiraan gudoonka waxbarashada ee degmadooda ama iskuulka uu ilmuhu wax ka baran doono.

Dugsiga aasaasiga ah
Waxbarashada aasaasiga ahi waa sagaal sanadoon. Dugsiyada qaarbaa leh ardaygii raba fasalka 10aad. Waxbarashada aasaasiga ah markii laga gudbo dhalinyaro fara badan ayaa sii wadata waxbarashada dugsiyada sare ama machadyada farsamada. Gabdhaha iyo wiilashuba way u siman yihiin waxbarashada. Waxaa suuragal ah, in ardayda waddanka u soo guurtey iyagoo koox gaar ah iskuulka lagu siiyo waxbarasho iyaga loogu talagalay. Markuu ardayga ajnebiga ahi u wareego fasalka caadiga ah ee ardayda Finnishka ahi dhigtaa wuxuu heli karaa caawimo waxbarasho dheeraad ah oo afkiisa hooyo wax loogu dhigayo.

- **Cuntada**

Cuntada ay dugsiyada aasaasiga ahi bixiyaan waa lacag la'aan. Hadii uu ardaygu cuno cuntooyin gaar ah, waxaad si gaar ah ugala hadlaysaa maamulka dugsiga, inta aanu ilmuhu dugsiga bilaabin ka hor.

- **Barashada diinta**

Dugsiga waxaa laga bixiyaa waxbarasho diinta ah. Dugsigu wuxuu waliba diyaariyaa waxbarasho ku saabsan aqoonta aragtida nolosha hadaanu ardaygu rabin inuu barto diinta. Waalidiintu waxay kala hadli karaan kala doorashada arimahaas maamulaha dugsiga.

Dugsiyada sare iyo machadyada farsamada
Waxbarashada aasaasiga ah ka dib, inta badan dhaliyaradu waxay waxbarashadooda waxay ka siiwataan dugsiyada sare ama machadyada farsamada. Dugsiyada sare iyo dhammaan machadada farsamada ee ardaygu bilaabo waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ka dib isku mar ayaa la dalbadaa oo hal codsi oo layiraahdo codsiga guud (yhteishaku) ayaa lagu dalbadaa. Ardayda waxaa lagu kala doortaa, siday waxbarashada dugsiga ugu kala sareeyeen, laakiin machadyada qaar ka mid ahi waxay ardayda ka qaadaan imtixaanka gelitaanka ama imtixaan luuqadda ah. Qofka waddanka u soo guurey waxaa lagu qaadan karaa nidaamka debecsan (joustava valinta), waa haddii aanu haysan shahaadada Finland laga qaato ee dugsiga hoose/dhexe.

Waxbarashada farsamada ee qaadata saddexda sannadood wuxuu ardaygu ku heleyaa xirfad uu ku shaqaysto. Dadka waddanka u soo guurey intaas ka hor ayey waxay ka qaybqaadan karaan waxbarashada loogu diyaarinayo waxbarashada xirfadda aasaasiga ah, waxayna qaadataa qiyaastii hal sano.

Waxbarashada dugsiyada sare waa mid qaadata mudo 2 ilaa 4 sano waxaana lagu bartaa aqoonta guud, markii la dhammeeyana waxaa la qaadaa imtixaanka qalinjebinta shahaadada dugsiga sare. Imtixaanka qalinjebinta dugsiyada sare ardayda luuqadoodu ay ajnebiga tahay si gaar ah ayaa loo tixgeliyaa. Dugsiga sare ka dib, waxaa suurogal ah in la dalban karo dhammaan jaamacadaha oo dhan iyo kulliyadaha sare. Sidoo kale shahaadada aasaasiga ah ee macadada farsamada lagu qaato ee saddexda sano ahi waxay ku suurogelinaysaa, inaad tacliinta sare dalbato.

Dadka waaweyni waxay waxbarashada dugsiga hoose/dhexe iyo waxbarashada dugsiga sareba ama maadooyin keli keli ah ku qaadan karaan dugsiyada sare ee dadka waaweyn, kuwaasoo habeenkii la dhigto. Machadyada farsamadu waxay leeyihiin qaybo u gaar ah Dadka waaweyn.

Waxabarashada la qabsashada waddanka
Waxaa laysku dayaa, in dadka waddanka u soo guurey ay helaa fursad ay kula siman yihiin dadka Finnishka, oo ah xagga adeegyada waxbarashada iyo isticimaalka daryeelada adeega bulshada. Iyadoo waxbarashada la adeegsanayo ayaa loo suurageliyaa inay go'aamada nolosha ee ay gaarayaan ay yihiin kuwo ay aqoon u leeyihiin. Ilmaha waddanka u soo guureyaan ee Finland degan ee ku jira da'da waxbarashadu waajibka ku tahay, wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarashada aasaasiga ah oo la mid ah tan Finnishka. Dadka waaweyn ee waddanka u soo guuray waxaa laysku dayaa, in la sugo siday ku heli lahaayeen waxbarashada aqoonta ay shaqada ugu baahan yihiin iyo aqoonta sii wadashadooda waxbarashada ama kordhisashada xirfadooda shaqo. Ujeeddaduna waa, in shahaadooyinka waxbarashada uu qofku dibedda ku soo bartay iyo waayoaragnimada shaqo uu uu leeyahay ay sal u noqdaan qorshihiisa waxbarasho ama dhammaystirashadiisa waxbarasho ee Finland. Hadafkuna waa inuu qofku helo laba luuqadood oo ilaa intii suuragal ah uu si fiican u yaqaan, macnuhuna waa inuu qofku si fiican u barto afka Finnishka ama Iswiidhishka, isagoo aan luminaynin afiisa hooyo iyo dhaqankiisatoona.

Waxbarashada la qabsashada waddanku waxay taageeraysaa oo qofka waddanka u soo guurey ka caawinaysaa sidii uu bulshada Finnishka ula qabsan lahaa. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan la qabsashada waddanka waxaad ka heleysaa qoraalka ay wasaaradda shaqadu soo saartey ee af Finnishka ah ee magaciisu yahay Maahanmuuttajien kotoutuminen Suomeen waxaana laga helaa bogga www.mol.fi/migration.

Kulliyadaha, kulliyadaha xirfaddaha iyo jaamacadaha
Kulliyadaha, kulliyadaha xirfaddaha iyo jaamacaduhu waxay ardayda ku qaataan imtixaanka doorashada iyo shahaadooyinka ay ardaydu haystaan. Kulliyad walba shuruudeheedu way ka duwan yihiin mida kale sidaas darteed waa, in ardeygu uu wakhti fiican si toos ah ula xiriiraa kulliyadda uu doonayo in uu dalbado. Jaamacadaha, kulliyadaha, iyo kulliyadaha xirfaddaha intooda badani waxay leeyihiin qof u xilsaaran hagida ardayda waddanka u soo guurtey. Waxaa kaloo intaa dheer in jaamacadda xagaagu (kesäyliopisto) qabanqaabiso waxbarasho xilliyada xagaaga, taas oo aad ka qaybqaadan kartid xitaa adoon jaamacadda arday ka ahayn.

Machadka shacabka
Macahadyada shacabaka waxaa lagu diyaarin karaa shahaadooyinka dugsiga hoose/dhexe, dugsiga sare, ama maadooyin keli keli ah. Waxaana intaa sii dheer in machadyada shacabku ay diyaariyaan waxbarsho xirfadeed. Qaar ka mid ah machadyada shacabku waxay leeyihiin koorsooyin gaar ahaan loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey. Waxbarshadu waa maalintii oo dhan, sidabadana ardeydu waxay degan yihiin guryaha ardayda ee machadka dhexdiisa.

Machadka shacabka iyo machadka waxbarashadaa dadka waaweyn
Degmooyinka Finland intooda badan waxay leeyihiin machadka shacabka ama machadka waxbarashada dadka waaweyn. Waana meelaha caanka ku ah waxbarashada dadka waaweyn. Machadyada shacabka ama waxbarashada dadka waaweyn waxaa wax laga bartaa wakhtiyada firaaqada ah, inta badan toddobaadkii hal mar. Maadooyinka loogu jecelyahay waa barshada luuqadaha qalaad. Waxaa kaloo machadyada lagu baran karaa xirfado kala duwan oo gacmaha laga qabto, maadooyinka faarshaxanka iyo jimicsiga. Faahfaahin dheeraad ah www.ktol.fi

Lacagta waxbarashada (Opintotuki)
Lacagta waxbarashada waxaa Kela-da looga dalban karaa waxbarashada dugsiga sare, machadka shacabka, machadada xirfadaha lagu barto iyo jaamacadda darteed. Waxbarashadu waa inay ahaataa mid maalintii oo dhan ah, waana inay qaadataa ugu yaraan laba bilood. Shuruudaha lagu helaana waa, in uu qofku helay goob waxbarasho, uuna u baahan yahay kaalmo dhaqaale. Ardayga aan qoyska lahayni wuxuu heli karaa kaalmada deegaanka (asumislisä), taas oo ku xiran caddadka lacagta ijaarka guriga. Markuu ardaygu deggen yahay guriga qoyska, wuxuu dalban karaa kaalmada guud ee ijaarka.

Ardaygu wuxuu kaloo bangiga ka heli karaa deynta waxbarashada, oo ay dawladdu damiin ka noqonayso. Dulsaarka deynta waxbarashada, baxbarashada oo socota ayaa bangiga la siiyaa, laakiin deynta laftyeeda waxaa la bixiyaa caadiyan markay waxbarashadu dhammaato ka dib.

Kaalmada waxbarashada (Koulutustuki)
Lacagta kaalmada waxbarashada waxaa la siiyaa qofka shaqo la'aanta ah ee ku jira waxbarashada xafiiska shaqadu bixiyo. Sidoo kale waxbarashada dadka waddanka u soo guurey waa waxbarashada xafiiska shaqada. Lacagta kaalmada waxbarashadu xoogaa yar ayey ka badan tahay lacagta qofka shaqo la'aanta ahi uu qaato.

8. Daryeelka caafimaadka

Xarumaha caafimaadka
Degmo iyo magaalo waliba waxay leedahay xarun caafimaad, oo u xilsaaran daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah ee dadka degmada ku nool. Soo ogow xaafadda aad xarunteeda caafimaadka ka tirsan tahay; caadiyan waa xarunta caafimaadka gurigaagu meeshuu ku yaallo

ugu dhow. Xarunta caafimaadku waxay qofka qaangaarka ah, haddii uu dhakhtar u yimaado ka qaadaa ama kharash sannadkiiba hal mar ah ama kharash laga qaado mar walba oo uu u yimaado. Kharashkan waxaa qofka laga qaadi karaa sannadkii ugu badnaan saddex mar. Qofka da'diisu 15 sano ka yar tahay adeegyada xarunta caafimaadku waa u lacag la'aan. Haddii uu qofka qaangaarka ahi la kulmo kalkaalisada caafimaadka ee xarunta caafimaadka, lacag lagama qaado.

Markaad rabto inaad la kulanto dhakhtarka xarunta caafimaadka, waa inaad hore ballan uga sii qabsataa. Ballan la'aan waxaa dhakhtarka lala kulmi karaa, haddii ay jirto keliya wax si degdeg ah ugu baahan in wax looga qabto. Hadafku waa, in baaritaanada iyo daaweynta aan degdegga ahayn uu qofku ku helo saddex maalmood gudohood. Xarumaha caafimaadku waxay leeyihiin heegan fiidkii iyo Sabtida iyo Axadda ah; hase ahaatee qaar aan heegan lahayn ayaa jira.
Xarumaha caafimaadka waxaa kaloo laga helaa adeegga dhakhtarka ilkaha, laakiin khaas ahaan xarumaha caafimaadka ee magaalooyinka waaweyni ma awoodaan, inay daaweeyaan ilkaha dadka qaangaarka ah oo dhan. Kelada ayaa laga dalban karaa, inay kuu soo celiso kharashka kaaga baxa dhakhtarka ilkaha ee barayfitka ah.

Rugaha daryeelka hooyada (Äitiysneuvolat)
Xarumaha caafimaadka waxaa ku yaalla rugaha daryeelka hooyada iyo carruurta loogu talagalay. Muddada uurka oo dhan xaaladda caafimaadka ee hooyada uurka leh iyo ilmaha caloosha ku jiraba waxaa lagula socdaa rugta daryeelka hooyada. rugta daryeelka hooyada waa, inay hooyadu tagtaa inta aanay dhammaan bisha afraad ee uurku, sababtoo ah waxay shuruud u tahay inay hooyadu hesho kaalmada hooyanimada. Waxaa kaloo kuu furan inaad dhakhtar barayfit ah u tagtid, laakiin dhammaan hooyooyinka uurka leh ee Finland joogaa waxay isticimaalaan adeegyada xarunta daryeelka hooyada.

Sida caadiga ah Finland dumarku waxay ku dhalaan isbitaalka. Aabbayaasha intooda badani way la joogaan, markay hooyadu ummulayso. Rugaha daryeelka hooyadu inta badan ummusha ka hor ayey hooyada soo tusaan isbitaalka ay ku dhali doonto.

Isticimaalka adeegga rugta daryeelka hooyadu waa lacag la'aan.

Rugaha daryeelka carruurta (Lastenneuvola)
Baaritaanka ummusha ka dambeeya ee hooyada dhashay waxaa lagu sameeyaa rugta daryeelka hooyada, ka dib ilmaha iyo qoysku waxay ku wareegaan xarunta daryeelka carruurta. Rugta daryeelka waxaa lagula socdaa caafimaadka iyo korriinka ilmaha, qoyska ilmuhu u dhashayna siyaabo badan oo kala duwan ayaa loo taakuleeyaa. Rugta daryeelka waxaa kaloo ilmaha lagu siiyaa tallaalada barnaamijka tallaalka ee waddanka Finland laga aqoonsan yahay. Ilmaha waxaa rugta daryeelka geyn kara hooyada ama aabbaha ama labadooda oo wada socda.

Rugaha daryeelka carruurtu waxay badanaa hooyooyinka iyo aabbahayaasha u qabanqaabiyaan koorsooyin iyo munaasabado ay ku sheekaystaan. Qoysasku markay munaasabadaas ka qaybqaataan waxay isbaranayaan qoysas kale oo ay isku xaaladnololeed yihiin iyo waxayna helayaan dad aqoonyahanno ah caawimadooda oo ku saabsan arrimaha la xiriira ilmaha caafimaadkiisa, koriinkiisa iyo barbaarintiisa.

Isticimaalka adeegga rugta daryeelka carruurtu waa lacag la'aan.

Daryeelka caafimaadka dugsiga

Markuu ilmuhu bilaabo dugsiga, rugta la talinta caafimaadka wuu ka wareegayaa oo waxaa lagu wareejinayaa qaybta daryeelka cafimaadka dugsiga. Kalkaalisada caafimaadka dugsigu caadiyan toddobaadkii laba maalmood ayey dugsiga joogtaa, oo ardaydu way u tegi karaan, si ay u qaabisho. Waalidkuna way la xiriiri karaa kalkaalisada caafimaadka dugsiga.

Barnaamijka tallaalka ee lagu bilaabay rugta la tallinta caafimaadka, dugsiga ayaa lagu sii wadayaa. Kalkaalisada caafimaadka dugsigu si joogto ah ayey ardayda baaritaan caafimaad ugu samaysaa, dhakhtarka dugsiguse si dhif ah ayuu ardayda baaritaan ugu sameeyaa.Waxaa wanaagsan, in kalkaalisada caafimaadka dugsiga iyo dhakhtarka dugsiga loo sheego, wixii dhibaato ah oo ardayga haysta, sababtoo ah iyagaa ardayga u diri kara dhakhtarka cilminafsiga ama qofka terabiga hadalka ku takhasusay. Ardayda dugsiga dhigata ilkahooda si joogto ah ayaa baaritaan loogu sameeyaa, waxaana lagu daaweeyaa rugta caafimaadka.

Dugmooyinku waxay qabanqaabiyaan daryeelka caafimaadka dugsiga ee ardayda dhigata dugsiga aasaasiga ah, machadka xirfadaha iyo dugsiga sare. Hay'adda caafimaadka ee ardayda shahaadada dugsiga sare qaadatay, ayaa u xilsaaran qabanqaabinta daryeelka caafimaadka ee ardayda waxbarashada tacliinta sare.

Daryeelka caafimaadka dugsiga iyo daryeelka ilkaha ee ardayda dhigata dugsiga aasaasiga ahi waa lacag la'aan.

Daryeelka bukaanka

Isbitaalka waxaa baaritaan ama daaweyn lagugu samayn karaa oo keliya, haddii uu dhakhtarka rugta caafimaadka ama dhakhtar barayfit ahi kuu diro. Dhibaatada degdegga ah looma baahna, in dhakhtar ku soo gudbiyey. Hadafkuna waa, in qofka bolikiliniga isbitaalka baaritaankiisa lagu sameeyo saddex toddobaad ka dib, marka uu dhakhtarku gudbiyo daryeelkana uu helo saddex bilood ama ugu badnaan lix bilood gudahood, oo laga bilaabayo wakhtiga la xaqiijiyey inuu qofku u baahan yahay daaweyn. Inta badan wakhtiga uu qofku sugo in la daaweeyo way ka badan yihiin wakhtiga loogu talagalay sugitaanka.

Bukaanku wuxuu bixiyaa maalintiiba kharash caqligal ah oo isugu jira kharashka baaritaanka, daryeelka lagu sameeyey, daawooyinka haynta iyo cuntada.

Daryeelka caafimaadka ee barayfitka ah

Gaar ahaan degmooyinka waaweyn waxaa ku yaalla dhakhaatiir barayfit ah iyo dhakhaatiirta ilkaha oo barayfit ah. Finland waxaa kaloo ku yaalla isbitaallo barayfit ah. Daryeelka caafimaadka ee barayfitku inta badan aad ayey uga qaalisan tahay daryeelka rugaha caafimaadka iyo daryeelka isbitaallada dowliga ah.

Kela-da ayaa bixisa qayb ka mid ah kharashka daryeelka ee dhakhaatiirta barayfitka ah iyo kharashka dhakhaatiirta ilkaha.

Daawooyinka

Daawooyinka waxaa laga iibsan karaa farmashiyaha oo keliya. Kela-da ayaa bixisa qayb ka mid ah qiimaha daawooyinka uu dhakhtarku soo qoro.

Xuquuqda qofka bukaanka ah
Finland waxaa ka jira sharciga xuquuqda qofka bukaanka ah. Sharciga qodobada ugu muhiimsani waa:

- Bukaanku wuxuu xaq u leeyahay daryeel wanaagsan iyo in si fiican loola dhaqmo. Luuqadda hooyo, dhaqanka iyo baahida shakhsi ahaaneed ee bukaanka waa hadba siday suuragal u tahay tixgelin loo siiyaa.
- Si loo daaweeyo qofka bukaanka ah, waxaa loo baahan yahay ogolaanshihiisa.
- Bukaanka waa in loo sheegaa xaaladda caafimaadkiisa iyo daaweynta: waxyaabaha ay daaweyntu ka kooban tahay, khatarta ku jiri karta iyo fursadaha kala duduwan ee daaweynta ee bukaanku uu kala dooran karo. Bukaanku wuxuu xaq u leeyahay inuu daaweynta oo dhan diido.
- Qofka daaweynta safka ugu jira waa in loo sheegaa sababta uu safka u galay iyo muddada uu qiyaastii safka ku jirayo.
- Ilmaha bukaanka ah waa in fikradiisa la tixgeliyaa, haddii koriinkiisu uu yahay mid ku filan inuu fikradiisa soo bandhigo. Dhakhtar ama qof kale oo takhasus u leh ayaa qiyaasaya in ilmaha koriinkiisu gaarsiisan yahay heer uu fikradiisa ku sheegi karo.
- Waalidka ilmaha bukaanka ahi xaq uma laha inay daaweynta ilmaha diidaan, haddii daaweyntu tahay mid wax lagaga qabanayo khatar nafsadda iyo caafiaadka ilmaha aan qaangaarka ahayn dhibaato u keenaysa.
- Qofku haddii aanu daaweynta ku qancin wuxuu arrintaas u sheegayaa meesha lagu daaweeyey ama wuxuu u dacwoonayaa shaqaalaha maamulka ee u xilsaaran inay ilaaliyaan waxqabadka daryeelka caafimaadka, caadiyanna waxaa loo dacwoodaa guddiga gobolka.
- Goobta daryeelka caafimaadku waa inay lahaataa qof shaqaale ah oo u xilsaaran inuu caawiyo bukaanka (potilasasiamies).

9. Adeegyada naafada

Finland waxaa laysku dayaa, inay dadka naafada ahi iyagoo dadka kale la siman iskuulka dhigtaan, wax bartaan oo bulshada ku dhexnoolaadaan shaqaystaanna. Degmada ayaa dadka naafada ah siisa adeegyo iyo taageerooyin dhaqaale oo waafaqsan sharciga naafada. Baanashada (kuntoutus) waxaa ka mid ah qalabka caawimada ee ay u baahan yihiin iyo tababarka la qabsashada. Adeegga gaadiidka, turjubaan iyo in guriga looga dhigo mid ku haboon waa adeegyo helitaanka xuquuqdoodu ku salaysan tahay baahida iyo inuu qofku isagu codsado. Baanashada daaweynta ah waxaa qabanqaabisa hay'adda u adeegga daryeelka caafimaadka.

Qof gaar ahaan u caawiya waxaa naafada loo ogolaadaa iyadoo si gaar ah looga fekerayo. Caawiyuhu wuxuu naafada ka caawinaya waxyaabaha nololmaalmeedka ah, dhigashada iskuulka amategidda shaqada.

Ururada naafada, xafiisyada sooshalka iyo isbitaallada ayaad ka heleysaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan u adeegyada naafada iyo baanashadooda.

Kaalmada Keladu siiso naafada iyo kuwa muddada dheer jirran

- **Lacagta daryeelka gaarahaaneed ee la siiyo waalidka ilmaha**
  Hooyada ama aabbuhu wuxuu heli karaan lacagta daryeel gaar ahaaneed oo ah mid la canshuuro, haddii midkood ka qaybqaato daryeelka iyo xannaaneynta ilmahooda buka

ee da'diisu ka yar tahay 16 sano, tusaale ahaan isbitaalka dhexdiisa ama mararka qaar, haddii guriga lagu daryeelayo oo xannaaneynay. Kaalmadan waxaa la siin karaa hooyada ama aabbaha, haddii midkood uu ilmaha buka xannaaneyntiisa darteed uu uga joogo shaqada, islamarkaana uu sidaa darteed ku waayo mushaarkiisii. Caddadka lacagta daryeelka gaarahaaneed waxaa la go'aamiyaa iyadoo la eegayo, inta dakhliga xannaaneyaha uu le'ekaa. kaalmadana waxaa la bixiyaa sannadkii ugu badanaan 60 maalmood oo ah maalmaha shaqada.

- **Kaalmada daryeelka guriga ee ilmaha jirran ama naafada ah**
  Kela waxay bixisaa kaalmo si guriga loogu daryeelo oo xannaaneeyo ilmaha naafada ah ama muddada dheer xanuunsan, ilmahaas oo u baahan daryeel gaar ahaaneed. Kaalmada waxaa hela ilmaha da'doodu ka yar tahay 16 sano, kaasoo daryeel u baahan ugu yaraan lix bilood daryeelkaasina uu sababayo kharash dheeraad ah.

  Dhakhliga qoysku ma saamaynayo helida kaalmada daryeelka ilmaha, canshuur lagama gooyo.

- **Kaalmada naafada**
  Qofka da'diisu u dhaxayso 16 – 64 sano xafiiska Kela-da ayuu ka heli karaa lacagta kaalmada naafada jirro ama naafo darteed. Kaalmadan waxaa la bixiyaa, haddii awoodda qofku naafo darteed u daciifto ugu yaraan hal sano. Kaalmadan cashuur lagama bixiyo. Dadka naafada ah ee aan awoodin inay shaqeeyaan, Kela-da ayey ka dalban karaan hawlgabka awoodid la'aanta shaqada (työkyvyttömyyseläke).

- **Baxnaanin**
  Qofka da'diisa ka yar tahay 65 sano ee naafadiisu tahay mid weyn, wuxuu codsan karaa baxnaanin wakhtiga dheer ah ama baxnaaninta daaweynta ah ee Kela-du qabanqaabiso. Kela-du waxay kaloo bixinaysaa kharashka qofka shaqaalaha ah ee xirfadda u leh baxnaaninta. Shirkadaha caymiskuna way bixiyaan kharashka baxnaaninta. Lacagta baxnaaninta wuxuu qofku codsan karaa, haddii ujeeddadiisu tahay inuu shaqada ku jiro ama uu rabo inuu shaqadiisii dib ugu noqdo. Lacagta waxaa qofka la siiyaa wakhtiga uuna awoodin inuu shaqeeyo.

10. Adeegyada waayeellada

Finland waayeelku badanaaba lama noola carruurtooda qaangaarka ah. Inta badan waayeelku waxay ku nool yihiin guryohooda ama guryo loogu talagay u adeegga waayeelka ama guryaha dadka gaboobay. Waayeelka waxaa muhiim u ah, inay taageero iyo isudhowaansho ka helaan carruurtooda iyo carruuta ay carruurtoodu dhaleen. Haddii ay dhacdo in taageerada ehelku ay ku fillaan weydo, tusaale ahaan shaqo awgeed oo kale, waayeelku waxay taageero ka heli karaan dibadda.

Adeegyada guriga
Waayeelka ku nool gurigiisa wuxuu taageero ka heli karaa debedda, haddii uu u baahdo, taasoo ay siinayaan dad loo carbiyey shaqada. Ujeeddaduna waa inuu waayeelku gurigiisa ku noolaado ilaa intay macquul tahay. Waayeelku xafiiska arrimaha bulshada ee magaalada ayuu ka codsan karaa, inuu helo caawimada adeegga guriga (kotipalvelu), iyadoo laga caawinayo waxyaabaha nolol maalmeedka ah ee aanu keligiis qabsan karin. Shaqaalaha adeegga gurigu waxay qofka ka caawinayaa xagga daryeelkiisa baxnaanintiisa sida ka soo adeegashada

dukaanka, cunta samaynta, qubaysashada iyo nadiifinta guriga. Qofka waayeelka ahi kharashka uu adeegan ka bixinayaa wuxuu ku xiran yahay dakhliga isaga soo gala.
Dadka waayeelka ahi waxay gadan karaan adeegga cuntada, markaas waxay noqonaysaa in wakhtiga lagu heshiiyo guriga loogu keeno cunto diirran oo raqiis ah. Waxaa kaloo degmooyin badani leeyihiin meelo gaar ah oo ah u adeegga waayeelka, meelahaas oo ay waayeelku tegaan oo ka cunteeyaan, kana qaybqaataan hawlaha waxbarashada iyo hiwaayadaha ee meesha ka socda.

Guryaha adeegga iyo guryaha dadka waaweyn
Waxaa jira guyo adeeg ah iyo guryaha dadka waaweyn oo loogu talagalay waayeelka aan keligood isku fillayn, inay gurigooda ku noolaadaan. Guryuhu waa guryo ijaar ah oo caadi ah ama waa kuwo ujeeddadan darteed loo dhisay, kuwaas oo helida caawimada qofka shaqaalaha ahi ay ku xiran tahay hadba baahida qofka. Guryaha dadka waaweyn waxaa deggan waayeelka daryeelka joogtada ah u baahan.

11. Sidee loo maalgeliya daryeelka bulshada?

Canshuurbixiyayaalka ayaa maalgeliya badbaadada arrimaha bulshada
Finland dadku canshuur ayey dakhligooda iyo hantidooda ka bixiyaan, oo ay siiyaan dowladda iyo degmooyinkaba. Lacagta canshuurta ayaa lagu maalgeliyaa kharashka daryeelka bulshada iyo adeegyada hay'adaha dowliga ah. Cashuurta dadka laga qaado ayaa tusaale ahaan lagu dayactiraa wadooyinka gaadiidka iyo kuwa tareenadaba iyo gaadiidka kale ee dowliga ah.

Waa in marwalba loo dhiibaa shaqobixiyaha kaarka canshuurta markaad shaqada bilaabeysid, karkaas oo laga helo xafiiska canshuurta ee degmada. Qof walba oo canshuurbixiye ah wuxuu canshuur siiyaa dowladda iyo magaalada uu deggen yahay.
Shaqabixiyuhu waa inuu mar walba shaqaalihiisa geliyaa caymis, shaqaaluhu ha ahaado ajnebi ama Finnish, ama qof yar ama qaangaar. Markaas shaqaaluhu wuxuu ku jiraa hawlgabka dadka shaqaysta iyo badbaadada bulshada, hadday ku dhacdo shaqo la'aan, awood darri ama gabow. Lacagta hawlgabka ee ka timaada mushaharka way ka fiican tahay tan aasaasiga ah ee Kela ay bixiso. Tusaale ahaan lacagta hawlgabka shaqadu waxay ka ururtaa lacagta qofka shaqaalaha ah iyo shaqo bixiyaha ay dhiibaan. Sida caadada ah masuuliyadda caymisku waxay saarantahay shaqobixiyaha, isagaana mushaharka shaqaalaha si toos ah ugua gooya canshuurta iyo qaybta shaqaaluhu ay tahay inuu bixiyo ee ah lacagta caymiska hawlgabka. Xarunta badbaadinta hawlgabka (eläketurvakeskus) ayaa isagoo lacag la'aan ah waxaa laga dalban karaa diiwaanka heshiiska shaqada (työsuhderekisteri) ee uu qofku isagu leeyahay, diiwaanka waxaa ku qoran dhammaan mushaharadii qofka la siiyey oo dhan, iyagayna lacagta hawlgabkushaqadu ku salaysan tahay.

12. Xagee caawimo laga helaa haddii xaalad mushaakil ah lagu jiro?

Lambarro telefoon oo muhiim ah
Buugga telefoonadu waa inuu yaallaa meel sahal looga heli karo. Lambarada telefoonada ee muhiimka ah waxaa wanaagsan, in liis lagu qoro oo telefoonka agtiisa la dhigo.

Marka xaalad khatar ah ay jirto
Lambarka guud ee gargaarka degdegga ahi waa 112. lambarka guud ee gargaarka degdegga ah Finland oo dhan waa isku mid. Lambarkanna lacag la'aan ayaa lagu wici karaa. Lambarka guud ee gargaarka degdegga ah waxaad ka dalban kartaa inuu kuu yimaado ambalaas, boolis iyo dabdemiska.

Caafimaadka maskaxda iyo adeegga dhibaatada
Haddii xaaladda cusub ee noloshu cadaadis xagga nafsada ah kugu keento ama qoyska ama qofkaad isqabtaan dhibaato idin dhex taasho, ma aha in laga baqo ama xishoodo in gargaar la dalbado. Mushaakilaadku waxay ku fudud yihiin in, intay cusub yihiin la xalliyo. Markaad gargaarka dalbaneysid uma baahnid wax warqad wargelin ah, laakiin mar walba hore wakhti u sii ballanso. Markaad wakhtiga ballansanaysid waxaa wanaagsan in aad sheegto, haddii aad ubaahan tahay turjubaan.

Xafiiska caafimaadka maskaxda iyo xarumaha latalinta qoyska
Xafiisyada caafimaadka maskaxdu waxay qofka siiyaan talooyin, waxayna u qabanqaabiyaan baaritaanno iyo daryeel daaweyn ah oo dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda la xiriira. Sidoo kale degmooyinka xarumahooda la talinta qoysaska waxaa iyagoo lacag la'aan ah laga helaa talooyin, baaritaanno iyo daaweyn. Waxaa qofka laga caawiyaa dhibaatooyinka iyo su'aalaha la xiriira xiriika dadka, nolosha reerka iyo barbaarinta ilmaha.

Faahfaahin dheeraad ah:

Xarunta SOS-keskus
Helsinki waxaa ka furan xarun dhibaatada ka caawisa (kriisikeskus). Waxayna u adeegtaa dhammaan dadka waddanka u soo guurey ee Finland deggan iyo qoysaskoodaba oo waxay ka caawisaa waxyaabaha la xiriira caafimaadka maskaxda iyo dhibaatooyinka bulshada. Adeegyadu waa lacag la'aan. Waa in wakhti ballan ah hore looga qabsadaa.

Xarunta SOS (SOS-keskus)
Maistraatinportti 4 A, dabaqa 4aad
00240 Helsinki
tel. (09) 413 505 01 (heeganka maalmaha shaqadu jirto saacadda 9-15)
faksi: (09) 4135 0570
www.mielenterveysseura.fi

Xarunta taageeridda ee Ururka Caafimaaka Maskaxda ee Koonfurta Galbeed ee Finland (Lounais-Suomen Mielenterveysseuran tukiasema)
Xaruntan kaalmadu waxay kaalmo iyo caawimo lacag la'aan ah oo xagga dhibaatada nolosha ah siisaa dadka waddanka u soo guurey ee deggan Koonfurta Galbeed ee Finland iyo qoysaskooda.

Xarunta taageeridda ee Ururka Caafimaaka Maskaxda ee Koonfurta Galbeed ee Finland
Lounais-Suomen Mielenterveysseura ry
Kriisikeskus, Turun tukiasema
Yliopistonkatu 24 a B 4, dabaqa 6aad
20100 Turku
tel. (02) 233 3442 (heeganka maalmaha shaqadu jirto saacadda 10-15)
faksi (02) 273 8779

Xarunta baxnaaninta kuwa la jirdilay
Xarunta baxnaaninta kuwa la jirdilay waxay caawisaa qaxootiga la ciqaabay ama la jirdilay iyo qaraabadooda. Sidoo kale qaxootiga nabadgelyada codsaday daryeel wuu ka codsan karaa xarunta. Xarunta baxnaanita waxaa wakhti laga qabsan karaa iyadoo telefoon loo soo diro ama warqad loo soo qoro amaba xarunta la tago. Sidoo kale shaqaalaha sooshalka ayaa la weydiisan karaa inuu wakhti ballan ah kaaga qabto.

Mäkelänkatu 58-60, dabaqa 4aad
00510 HELSINKI
tel. (09) 7750 4584, maalmaha shaqadu jirto saacadda 8.30-15.00
faksi (09) 260 0220
kitu@helsingindiakonissalaitos.fi

Guryaha ammaanka
Guryaha ammaanku waxay siiyaan deegaan nabadgelyo leh xubnaha qoyska ee gurigooda kula kulma dagaal xagga jirka ama nafsadda ah. Macaamiisha intooda badani waa hooyooyin, laakiin sidoo kale aabbayaalkuna way tegi karaan guryaha ammaanka. Carruurta waa loo soo kaxaysan karaa guryaha ammaanka. Dhammaan magaalooyinka waaweyni waxay leeyihiin guryo ammaan, magaalooyinka yar yar waxay leeyihiin guryo khaas ah oo loogu talagaly markay mushaakilaad dhacaan.

Guriga ammaanka ee kuugu dhow magaalada aad degen tahay telefoonkiisa waxaad ka heli kartaa shaqaalaha sooshalka ee degmadaada. Haddii arrin degdeg ah oo dhibaato ahi ay jirto, haddii xafiiska sooshalku xiran yahay saldhiga boliiska degmada ayaa kaa caawinaya sidii aad ku heli lahayd guriga ammaanka.

Xarumaha bukaan socod eegtada aalkoliistayaasha (A-klinikat)
Xarumaha bukaan eegtada aalkohooliistayaasha (A-klinikka) sababaha loo tegi karo waa haddii qofku dhibaato shakhsi ahaan ama qof xigtadiisa ah ay ka heysato isticmaalka mukhaadaraadka. Xarumaha waxaa lagu daaweeyaa dhibaatooyinka ku salaysan ku tiirsanaanta ama caadeysashada isticmaalka aalkolada, daawooyinka, daroogada iyo waxyaabaha kale ee maandooriyayaasha ah. Xarunta waxaa kale oo uu qofku tegi karaa, si uu joojiyo soonoqnoqoshada isticmaalka maandooriyayaasha ama xallinta dhibaatooyinka ay maandooriyayaashu keenaan. Cinwaanka iyo telefoonka xarunta bukaan eegtada aalkoliistayaasha ee degamadaada waxaad ka heli kartaa xafiiska sooshalka ee degmada.

Kaalmada arrimaha sharciga
Xafiisyada qareennada degmooyinka waxay dadka ka caawiyaan kalana taliyaan arrimaha ku saabsan sharciyada. Sidoo kale xafiisyadaas ayaa laga helaa adeegayada qarennada muddada lagu gudo jiro arrimaha maxkamadaha. Lacagta adeegyada ee uu qofku bixinayo waxay ku xiran tahay hantidiisa. Qofka awoodiisa dhaqaale liidato wuxuu heli karaa qareen lacag la'aan ah oo ka caawiya arrimaha maxkamadaha.

Xafiiska wakiilka ka ah qolooyinka tiro ahaan waddanka ku yar
(Vähemmistövaltuutetuntoimisto)
Wakiilka arrimaha qolooyinka tiro ahaan wuxuu la socdaa hadba heerka ay marayso xaaladda dadka ajnebiga ah iyo xuquuqda ay leeyihiin, waxay ka wargeliyaan dadka waddanka u soo guurey arrimaha ku saabsan sharciga, sidoo kale waxay khaas ahaan kala taliyaa su'aalaha ku saabsan midabtakoorka ajaanibta iyo xuquuqdooda.Xafiiska telefoon ayaa loo diri karaa lana weydiin karaa wixii talo ah, ama si shakhsi ahaan ah ayaa loo tegi karaa. Laakiin waa inaad wakhti ka ballansataan.

Vähemmistövaltuutettu
Työministeriö
Mikonkatu 4, dabaqa 6aad
PL 34
00023 VALTIONEUVOSTO
Telefoon: +358 9 160 06 (lambarka laga gudbiyo)
Telefaksi: +358 9 160 47002

Waaxda la talinta qoxootiga (Pakolaisneuvonta)
Qareennada waaxda la talinta qoxootiga waxay si lacag la'aan ah u siiyaan caawimaad ku saabsan dhanka sharciyada dadka magangelyada dalbaday, kuwa qoxootiga ah iyo ajnebiga kaleba. Waaxdu waxay badanaaba ka caawisaa qoxootiga arrimaha la xiriira codsiga qoxootinimada, laakiin sidoo kale waaxada waa la wediisankaraa talooyin ku saabsan heerka xuquuda ajaanbta. Haddii aad doonayso inaad la kulanto waa inaad mar walba waqkhti ballan ah qabsataa.

Sidoo kale waa suurogal in telefoon wixii talo ah lagu dhameeysto. Waaxda la talinta qoxootigu Helsinki mooyee waxay kaloo xafiisyo ku leedahay Vaasa, Kouvola iyo Oulu. Xarunta weyn waxay ku taallaa Helsinki:
Pakolaisneuvonta ry
Varastokatu 12 B, 00580 Helsinki
tel. (09) 2519 000, faksi (09) 2519 0020
cinwaanka e-mailka pakneuv@kaapeli.fi
www.pakolaisneuvonta.fi

Qareennada barayfitka ah
Finland Waxaa jira qareenno aqoon gaarka ah u leh xallinta dhibaatooyinka sharciga ku saabsan ee dadka waddanka u soo guurey. Adeegyada qareennada baraayfitka ahina badanaa waa qaali, laakiin mararka qaarkood dowlada ayaa bixisa kharashka ku baxa maxkamadda. Meelaha lagala xiriiri karo qareennadda barayfitka ah waxaad ka helaysaa buugga telefoonnada.
Faahfaahin dheeraad ah: www.lakimiesliitto.fi

Baadigoobka caalamiga ah ee dadka la la' yahay
Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (SPR) ayaa lala xiriiraa haddii la doonayo in la baadigoobo qof qoyska ka tirsan oo la waayey. Baadigoobku wuxuu ku bilaabmayaa iyadoo lala xiriirayo xarunta dhexe ee xafiiska Ururka Laanqayrta Cas. Ururka Laanqayrta Cas wuxuu kaloo la taliyaa dadka magangelyada dalbada iyo qaxootigaba, wuxuuna la socdaa sida loo hirgeliyo dhawrista xuquuqdooda. Intaas waxaa sii dheer in saldhigyada Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (SPR) ay leeyihiin waxqabadka taakuleynta dadka. Waaxaha laanqayrta casi way u furan yihiin qof walba oo waxqabadkooda xiisaynaya.

Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (Suomen Punainen Risti)
Tehtaankatu 1 a
00140 Helsinki
tel. (09) 129 31

Cinwaanno faa'iido leh oo internetka ah:
www.suomi.f
http://virtual.finland.fi
www.eduskunta.fi
www.vn.fi

www.mol.fi
www.stm.fi
www.formin.fi
www.oph.fi
www.eurooppa-tiedotus.fi
www.kela.fi
http://www.lib.hel.fi/mcl
www.makupalat.fi

Edita Prima Oy

TYÖMINISTERIÖ

Qoraalkan waxaa cusbooneysiiyey**:**

Pirkko Jyväkorpi, Wasaaradda Shaqada
Eeva-Liisa Niinioja, Hay'adda Caymiska Caafimaadka Qaranka
Daabacaadan waxaad ka heleysaa cinwaanka: www.mol.fi/migration/
Soosaare iyo maalgeliye:
Wasaaradda Shaqada, Hay'adda Caymiska Caafimaadka Qaranka
ISBN:
Daabacaadda la cusbooneysiiyey ee 5aad

Sawirrida: Nick Fredriksson

Qorshaha garaafka iyo hawsha daabacaada Edita Prima Oy, Helsinki 2003
asiakaspalvelu.prima@edita.fi
tel. 020 450 011
faksi 020 450 2470
S u o m i
EDITA Oyj
PL 800, 00043 EDITA, lambarka laga gudbiyo 020 450 00
U adeegga macaamiisha
telefoon 020 450 05, faksi 020 450 2380

Luuqadaha qoraalka loo turjumey:
- Finnish
- Iswiidhish
- Istooniya
- Ingiriis
- Faransiis
- Ruush
- Bershiya
- Kurdi
- Carabi

Nooca internetka ku jira:
www.mol.fi/migration
- Serbokroaatti
- Soomaali
- Albaniya
- Viitnam
- Dari

TM 7.902